**SHARCI LR. 22** **TAARIIKH: 13 FEBRAAYO 2024**

**SHARCIGA ILAALINTA iyo MAAREYNTA DEEGAANKA**

**MADAXWEYNAHA J.F.S,**

**MARKUU ARKAY:** Qodobka 87aad, Faqradda 1aad iyo Faqradda 2aad ee Dastuurka KMG.

**MARKUU ARKAY:** Qodobka 90aad, Xarafka "F" ee Dastuurka KMG.

**MARKUU ARKAY:** Warqadda Guddoomiyaha Golaha Shacabka ee summaddeedu tahay **XGGSH/0494/B11/24**, ku taariikheysan **10/02/2024**, ujeeddaduna tahay Soo Gudbin Ansixinta"Hindise Sharciyeedka Ilaalinta iyo Maareeynta Deegaanka".

**MARKUU TIXGELIYAY:** Baahida loo qabo in la meel mariyo sharcigan.

**Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray sharcigan:**

**Qodobka 1aad**

Laga billaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo Sharcigan, waxaa si rasmi ah loo oggolaaday Sharciga Ilaalinta iyo Maareeynta Deegaanka.

**Qodobka 2aad**

Marka uu Madaxweynaha J.F.S. saxiixo Sharcigan, waxa lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
OFFICE OF THE PRESIDENT

**Madaxweynaha J. F.S.**

**Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud**

**Jumhuuriyadda Federaalka ee Soomaaliya**
**Golaha Shacabka**
**Xafiiska Guddoomiyaha**

**جمهورية الصومال الفيدرالية**
**مجلس الشعب**
**مكتب الرئيس**

**Federal Republic of Somalia**
**House of the People**
**Office of the Speaker**

**Tix: XGGSH/0494/B11/24:الرقم**

**Muqdisho, Febraayo 10, 2024 التاريخ**

**Ku: -** **Madaxweynaha Jumhuuriyadda Federaalka Soomaaliya**

**Ujeeddo: -** **Soo Gudbin Ansixinta**
**"Hindise-Sharciyeedka Ilaalinta iyo Maareynta Deegaanka"**

**M.ne Madaxweyne;**

Waxaan si waafaqasan Qodobka 82aad Faqaradda 3aad ee Dastuurka KMG halkan kuugu soo gudbinaynaa Nuqulka Rasmiga ah ee Hindise-Sharciyeedka Ilaalinta iyo Maareynta Deegaanka oo Golaha Shacabka iyo Aqalka Sare mid walba gaarkiisa u soo ansixiyey.

Hindise Sharciyeedka Ilaalinta iyo Maareynta Deegaanka wuxuu Golaha Shacabka soo gaaray taariikhdu markay aheyd 13/02/2023 wuxuuna maray dhammaan habraacyada kala duwan ee akhrinta 1aad, 2aad iyo 3aad. Golaha Shacabka wuxuu si waafaqsan Qodobka 82(1)(a) ee Dastuurka KMG ansixiyey hindise-sharciyeedkan 08/03/2023 isla markaana waxaa loo gudbiyey Golaha Aqalka Sare si ay waajibaadkooda Dastuuriga ah uga gutaan. Golaha Aqalka Sare wuxuu dhankiisa ansixiyey Hindi-sharciyeedkaan 27/08/2023 asagoo wax-ka-baddal ku sameeyey qodobka 14aad, wax-ka-badalkaas oo Golaha Shacabku ku waafaqay Kulankiisa 17aad ee Kalfadhiga 4aad ee qabsoomay 10/02/2024.

Haddaba, M.ne Madaxweyne, waxaan si waafaqasan Qodobka 90(f) ee Dastuurka KMG kaaga codsanaynaa in aad Hindise Sharciyeedka Ilaalinta iyo Maareynta Deegaanka ku meelmariso Xeer Madaxweyne, si loogu soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Jumhuuriyadda una noqdo sharci, si waafaqsan Qodobbada 84aad iyo 85aad ee Dastuurka KMG.

Naga Guddoon Salaan Qiimo Badan.

**M.ne Sheekh Aadan Maxamed Nuur "Madoobe"**
**Guddoomiyaha Golaha Shacabka**

Og: Ra'iisul Wasaaraha Xukuumada Federaalka.
Og: Guddoomiyaha Aqalka Sare.
Og: Garyaqaanka Guud ee Dawladda.
Og: Hantidhowrka Guud Qaranka.
Og: Xoghayaha Guud ee Golaha Shacabka.
Og: Waaxda Shuruucda Golaha Shacabka.

E-mail. speaker@parliament.gov.so Tell: +252 616641550/+252 618153111
Website: www.parliament...

**Jamhuuriyadda Federalka Soomaaliya**
Golaha Shacab
Guddiga Kheyraadka Dabiiciga iyo Bii'ada

**جمهورية الصومال الفيدرالية**
مجلس الشعب
لجنة الموارد الطبيعية والبيئة

**Federal Republic of Somalia**
House of the People
Natural Resources & Environnment Committe

**Summad: GKHDB/GSH/B11/0013/24** **Taariikh: 03/02/2024**

**Ku: Guddoomiyaha Golaha Shacabka ee BFS** **=Muqdisho=**

**UJECDDO: WAR BIXIN HINDISE-SHARCIYEEDKA ILAALINTA IYO MAREYNTA DEEGAANKA EE KA SOO LAABTAY AQALKA SARE.**

Mudane Guddoomiye,
Annagoo ah Guddiga Kheyraadka Dabiiciga iyo Bii'ada ee Golaha Shacabka, waxaan halkaan Golaha ugu soo gudbineynaa faahfaahin kooban oo ku saabsan Hindise-Sharciyeedka Ilaalinta iyo Maareeynta Deegaanka oo ay Golaha Shacabka ansixiyeen kalfadhigii 2$^{aad}$ kulankiisii 27$^{aad}$.

Mudane Guddoomiye, sharcigaan wuxuu maray habraca saxda ah ee uu qabo Qodobka 84$^{aad}$ ee Xeerhoosaadka Golaha Shacabka kaas oo tilmaamaya "Hindise Sharciyeed walba waa in laga hor-akhriyaa Golaha Shacabka saddex jeer oo kala duwan, saddex maalmood oo kala duwan, ka hor intuusan ansax noqon". Sidoo kale, Guddigu wuxuu Hindise Sharciyeedka mariyay si waafaqsan Qodobada kala ah 85$^{aad}$, 86$^{aad}$, 87$^{aad}$, 88$^{aad}$, iyo 90$^{aad}$ ee Xeer-hoosaadka Golaha Shacabka.

Guddiga asagoo gudanaya waajibaadkiisa Dastuuriga ah ayuu ku soo daray talooyinka iyo toosinta Golaha Shacabka ay soo jeediyeen Akhrintii labaad iyo sadexaadba. Ugu danbeyn Golaha ayaa ansixiyay Hindise Sharciyeedkaan 8$^{dii}$ Maarso, 2023, una gudbiyay Golaha Aqalka Sare ee BJFS.

Mudane Guddoomiye, Xildhibaanada Sharafta leh, sidoo kale Aqalka Sare waxay Sharcigaan marsiiyeen habraacii saxda ahaa ee uu farayay Dastuurka iyo Xeer-hoosaadkooda. Waxaa jirta in Golaha Aqalka Sare ay ku soo lifaaqeen talo bixin qoraal oo nuxurkiisu daarnaa;

1. in Qodobka $14^{aad}$ ee sharcigan uu dhisaayo Guddi Qaranka ee Degaanka, oo uu Guddoomiye ka yahay Wasiirka Wasaaradda Deegaanka iyo Isbedelka Cimillada ee XJFS, sida ku cad qodobka $14^{aad}$, Faqradiisa $1^{aad}$, Xarafkiisa B.
2. in sidoo kale uu sharcigaan siinaayo Xubna ka socdo Guddiyada Kheyraadka iyo Bi'ada ee Labada Aqal ee BJFS ka mid noqoshada Guddigaas sida ku cad isla qodobka $14^{aad}$, faqradiisa $1^{aad}$, xarafkiisa S.
3. Guddiga Aqalka Sare ayaa tala ku soo-jeediyay in aysan ka mid noqon Guddiga la dhisaayo Wasiirka Wasaaradda Deegaanka iyo Isbedelka Cimillada,Wasaarad kale iyo Xubnaha labada Gole ee BJFS, lagana saaro Qodobada u ogolaanayo Wasiirka iyo Guddiyada labada Gole.
4. Sidoo kale, Guddiga ayaa talo ku soo jeediyay in wax ka bedel lagu sameeyo Qodobka $72^{aad}$ ee sharcigan dhammaan Faqradahiisa kala ah $1^{aad}$, $2^{aad}$, $3^{aad}$ iyo dhammaan Xarfahiisa.
5. Guddigu waxay arintaan ku sheegeen in qodobka $72^{aad}$ ee ka hadlaya Mamnuucidda bacaha, waxayna sheegeen in faah-faahinta walxahan oo dhan ay tahay in lagu caddeeyo Xeer-Nidaamiyaasha sharcigaan ka farcami doono.
6. Haddaba, Golaha Aqalka Sare taladaas waay qaateen wayna soo ansixiyeen, waxayna ku soo lifaaqeen Nuqulkii soo jeedinta Guddiga Aqalka sare.
7. Waxaa intaa dheer, in uu sharcigaan ka kooban yahay 18 Cutubka, 102 Qodob iyo laba lifaaq.
8. Qodobada sharcigaan wuxuu Golaha Shacabka ku ansixiyay 102 qodob, balse waxaa jiray khalad madbaci ah, kaasoo ahaa in **laba jeer** lagu soo celiyay Qodobka $56^{aad}$ ee sharcigaan, qodkaa markii la saxayna ka dhigtay tirada Qodobada Sharcigaan 101 qodob.

Mudane Guddoomiye,

Aqalka Sare wuxuu qodobo Sharcigaan ka mid ah ku sameeyay, dib u siiqeeyn luqadeed, faah-faahin iyo wax ku darid fudud, qodobadaas oo kala ah $1^{aad}$, $2^{aad}$, $6^{aad}$, $7^{aad}$, $8^{aad}$, $17^{aad}$, $36^{aad}$, $38^{aad}$, $39^{aad}$, $41^{aad}$, $48^{aad}$, $51^{aad}$, $54^{aad}$, $59^{aad}$, $60^{aad}$, $63^{aad}$, $64^{aad}$, $66^{aad}$, $67^{aad}$, $68^{aad}$, $69^{aad}$, $70^{aad}$, $71^{aad}$, $77^{aad}$, $78^{aad}$, $79^{aad}$, $82^{aad}$, $84^{aad}$, $85^{aad}$, $96^{aad}$, $101^{aad.}$ Dhammaan Qodobadaan waxaa lagu sameeyay toosin iyo wax ku darid fudud oo wanaagsan.

Mudane Guddoomiye, Mudanayaal iyo Marwooyin, Guddiga Kheyraadka Dabiiciga & Bii'ada asigoo tix gelinaayo ahmiyadda uu sharcigaan u leeyahay bed-qabka deegaanka iyo noolayaasha kala duwan ee ku nool JFS, wuxuu isla qaatay in sharcigaan lagu gudbiyo sidii ay ku soo ansixiyeen Aqalka Sare, sababtoo ah haddii Golaha Shacabku ku noqdo wax ka bedelka Aqalka Sare, waxaa usoo baxday in Sharcigaan Muhiimka ah uu dheeranayo dhameystiranka Sharcinimadiisa.

Villa Hargeisa, Mogadishu Somalia. Tel: +252 612470001
E-mail: nresources.committee@parliament.gov.so
Website: www.parliament.gov.so

Haddaba, mudane Guddoomiye, waxaan adiga iyo Goluhuba halkaan idin kugu soo gudbineeynaa in cod buuxa lagu gudbiyo Hindise Sharciyeedkaan si waafaqsan Qodobka 97aad faqradiisa (5) ee Xeer-hoosaadka Golaha Shacab, iyadoo Goluhu ku raacayo Aqalka Sare:-

1. talooyinkii iyo toosinnadii ay ku sameyeen Hindise Sharciyeedkaan si waafaqsan Qodobka 82aad, faqradiisa 4, Xarafkiisa (a) ee Dastuurka KMG iyo Qodobka 97aad (5) ee Xeer-hoosaadka Golaha Shacabka.
2. in Sharcigaan loo diro Madaxweynaha Jamhuuriyadda sida uu qabo Qodobka 83aad faqradiisa 2 xarafka (a) ee Dastuurka KMG ah iyo Qod. 97aad, faqradiisa (5) ee Xeer-hoosaadka Golaha Shacabka.
3. Sidoo kale la hubiyo Nuqulka saxda ah ee oo loo diraayo Madaxweynaha si waafaqsan Qodobka 91aad faqradiisa (5) ee Xeer-Hoosaadka Golaha Shacabka. Sidoo kalana, la waafajiyo soo-jeedinta ay Guddiga Aqalka Sare ku soo lifaaqeen Nuxulka asalka ah, laguna daro talooyinkooda ah; (in Wasiirrada iyo Guddiyada labada Aqal laga saaro Guddiga Qaran ee uu sharcigaan dhisaayo sida ku cad Qodobka 14aad), maadaama ay labadaasi yihiin Hey'adahii lahaa kor joogtada iyo la xisaabtan.

Ugu dambayn, Guddiga Kheyraadka Dabiiciga & Bii'ada wuxuu idinka codsanayaa in aad ku gudbisaan Sharcigaan cod aqlabiyad ah.

Mahadsanidiin

BAARLAMAANKA FEDERAALKA SOOMAALIYA, GOLOHA SHACABKA
NATURAL RESOURCES & ENVIRONMENT COMMITTEE
لجنة الموارد الطبيعية والبيئة
مجلس الشعب
HOUSE OF THE PEOPLE
GUDDIGA KHEYRAADKA DABIICIGA & BII'ADA

Xil. Yuusuf Xusseen Axmed Gama'diid
Guddomiyaha Guddiga Kheyraadka Dabiiciga iyo Bii'ada
Golaha Shacabka, Baarlamaanka Jamhuuriyadda Ferderaalka Soomaaliya.

Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
Golaha Shacabka
Xafiiska Guddoomiyaha

جمهورية الصومال الفيدرالية
مجلس الشعب
مكتب الرئيس

Somali Federal Republic
The House of the People
Office of the Speaker

**Ref: XGGSH/0223/B-11/23 :الرقم**

**Mogadishu, March 9, 2023 :التاريخ**

**Ku:** Guddoomiyaha Aqalka Sare.
**Og:** Madaxweynaha Jamahuuriyadda Federaalka Soomaaliya.
**Og:** Ra'iisal Wasaaraha Xukuumada JFS.
**Og:** Wasaaradda Maaliyadda.
**Og:** Garyqaanka Guud ee Dawladda.
**Og:** Xoghayaha Guud ee Golaha Shacabka.
**Og:** Waaxda Shuruucda ee Golaha Shacabka.

**UJEEDO: ANSIXINTA HINDISE SHARCIYEEDKA ILAALINAYA MAAREYNTA DEEGAANKA**

Mudane Guddoomiye,
Mudanayaal,

Waxaan halkaan idinkugu soo gudbinayaa, si aad waajibaadkiina uga gudataan Ansixinta **Hindise Sharciyeedka Ilaalinaya Maaraynta Deegaanka**. Goluhu wuxuu ku ansixiyay Hindise Sharciyeedkaan kalfadhigiisa 2aad, kulankiisa 27aad taariikhdu markay ahayd **8/03/2023,** codayntuna sidaan ayay u dhacaday:

| | |
|---|---|
| **Koramka:** | 143 |
| **Oggol:** | 143 |
| **Diiday:** | 0 |
| **Ka aamustay:** | 0 |

Naga guddooma Salaan diiran iyo qaddarin gaar ah

**M.ne Sheekh Aadan Maxamed Nuur "Madoobe"**
**Guddoomiyaha Golaha Shacabka BJFS**

**Tell:** +252 616641550/+252 618153111
**E-mail.** speaker@parliament.gov.so
**Website:** www.parliament.gov.so

# ANSIXINTA HINDISE SHARCIYEEDKA ILAALINAYA MAAREYNTA DEEGAANKA

| | |
|---|---|
| **Tirada Xubnaha Codeysay: 143** | |
| **Oggol: 143;** | |
| **Diiday: 0;** | |
| **Ka Aamustay: 0;** | |
| **Guddoomiyaha Golaha Shacabka Baarlamaanka JFS** | |
| **M.ne Sheekh Aadan Maxamed Nuur "Madoobe"** | **Tar: 09/03/2023** |
| **Xoghayaha Guud ee Golaha Shacabka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.** | |
| **M.ne Cabdiraxmaan Maxamed Cabdulle (Jaabiri)** | **Tar: 06/03/2023** |

**Tixraac:XRW/**157**/02/2023** **Taariikh: 09/02/2023**

**Ku: Guddoonka Golaha Shacabka JFS** **=Muqdisho=**

**Og: Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya** **=Muqdisho=**

**Ujeeddo: <u>Soo Gudbin Hindise-sharciyeedka Maareynta Deegaanka</u>**

**Mudane Guddoomiye,**

Iyada oo la tix-raacayo Go'aanka Shirka Golaha Wasiirrada summaddiisuna tahay **SHGW.00.22.02.23 ee 09/02/2023,** kuna saabsan ansixinta **"Hindise-sharciyeedka Maareynta Deegaanka"** oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyey.

Sidaa awgeed, Mudane Guddoomiye, waxa aan halkan idin-kugu soo gudbinaynaa **"Hindise-sharciyeedka sare ku xusan"** si aad uga gudataan waajibaadkiina Dastuuriga ah; waxa aan idinka codsanaynaa in aad fududeysaan ansixinta **"Hindise - sharciyeedka Maareynta Deegaanka"** maadaama baahi weyn loo qabo meel marinta .

**Xiriir iyo wada shaqeyn wacan.**

Hala badiyo

14/02/2023

XUKUUMADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA XAFIISKA RA'IISUL WASAARAHA
FEDERAL GOVERNMENT OF SOMALIA OFFICE OF THE PRIME MINISTER

**Mudane, Hamza Cabdi Barre**
**Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS**



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
GOLAHA SHACABKA
TAR: 13-2-2023
TIX: 46

Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha

جمهورية الصومال الفيدرالية
مكتب رئيس الوزراء

The Federal Republic of Somalia
Office of the Prime Minister

---

**Tixraac:XRW/103/02/2022** **Tariikh: 09/02/2023**

**Ku: Wasaaradda Deegaanka iyo Isbadalka Cimilada =Muqdisho=**
**Ku: Dhammaan Xubnaha Golaha Wasiirrada =Muqdisho=**
**Og: Guddoonka Golaha Shacabka JFS =Muqdisho=**
**Og: Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya =Muqdisho=**

**Ujeeddo: - Go'aan Gole, Ansixinta Hindise-sharciyeedka Maareynta Deegaanka**

**Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS;**

**Markuu arkay:** Qodobka 99aad farqadaha (a), (b) iyo (c) ee Dastuurka KMG.

**Markuu arkay:** Qodobka 100aad farqadaha (a) iyo (d) ee Dastuurka KMG.

**Markuu arkay:** Soo jeedinta Wasiirka Wasaaradda Deegaanka & Isbadalka Cimilada

**Markuu arkay:** Go'aanka Shirka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW.00.22.02.23 ee 09/02/2023,** kuna saabsan ansixinta "**Hindise-sharciyeedka Maareynta Deegaanka**" oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyey.

**Markuu tixgeliyey:** Muhiimadda uu dalka u leeyahay Hindise-sharciyeedka Maareynta Deegaanka.

**Wuxuu Meel-mariyey:**

**Qodobka 1aad**

Go'aanka Shirka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW.00.22.002.23 ee 09/02/2023,** kuna saabsan ansixinta " **Hindise-sharciyeedka Maareynta Deegaanka** " oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyey.

## Qodobka 2aad

In "**Hindise-sharciyeedka Maareynta Deegaanka**" si deg deg ah loogu gudbiyo Golaha Shacabka, si ay uga gutaan waajibaadkooda dastuuriga ah.

XUKUUMADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA RA'IISUL WASAARAHA
FEDERAL GOVERNMENT OF SOMALIA
OFFICE OF THE PRIME MINISTER

**Mudane, Hamza Cabdi Barre**
**Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS**

**SUMMAD: XGG/014/2023** **11/01/2023**

**Ku: Wasaaradda Deegaanka iyo isbaddalka Cimilada XFS** **Muqdisho**
**Ku: Agaasimaha Golaha Wasiirada** **Muqdisho**
**Og: Xafiiska Ra'iisul-wasaaraha Xukuumadda JFS** **Muqdisho**

**Ujeeddo: Talo Sharci iyo Siyaasadiisa**

Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dowladda asaga oo tixraacaya Warqadda **Ref. WDIC/XW/0005/2022,** ee ku taariikhaysan **31 December, 2022**, Ujeeddadeeduna ahayd **Soo Gudbin Siyaasadda Qaran ee Maaraynta Deegaanka iyo Hindise Sharciyeedka maaraynta Deegaanka,** kana Soo baxday Wasaaradda Deegaanka iyo Isbaddalka Cimiladda.

Hadaba, Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dowladda, asaga oo gudanaaya waajibaadkiisa shaqo si waafaqsan Sharci Lr. 18 ee 29 janaayo 1976, waxa uu halkaan idinkugu soo gudbinayaa:

**Siyaasadda Qaran ee Maaraynta Deegaanka iyo Hindise Sharciyeedka maaraynta Deegaanka** oo ay Wasaaradda Deegaanka iyo isbaddalka Cimilada horay ugu soo gudbisay Xafiiska Garyaqaanka Guud, si uu uga guto waajibaadkiisa Shaqo, uguna bixiyo Talo Sharci.

Sidaa darteed, Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dowladda markuu darsay, kuna sameeyay hagaajin iyo sixid kuna biiriyay farsamo aan looga maarmin sameynta Hindise-sharciyeedkan iyo Siyaasadiisa, waxa uu Xafiiska Garyaqaanka Guud ku talinayaa in loo gudbiyo Golaha wasiirada, maadaama aysan ka hor-imaanayn Dastuurka, Shuruucda Dalka iyo Danta Guud, uuna Xafiiska ka gutay waajibaadkiisa Shaqo ee kaga aadanaa, si waafaqsan Sharciga.

**FG**: halkaan waxaa ku lifaaqan Hindise Sharciyeedka iyo Siyaasadiisa Sare ku xusan.

**Avv. Maxamed Muxumed Cumar**
**Ku-xigeenka Garyaqaanka Guud ee Dowladda**

XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE DAWLADDA ★ OFFICE OF THE STATE ATTORNEY GENERAL ★ مكتب المحامي العام لدولة

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
Wasaaradda Deegaanka & Isbeddelka Cimilada
Xafiiska Wasiir ku xigeen-ka

هورية الصومال الفيدرالية
ارة البيئة والتغير المناخي
ب نائب الوزير

FEDERAL REPUBLIC OF Somalia
MINISTRY OF ENVIRONMENT & CLIMATE CHANGE
OFFICE OF THE DEPUTY MINISTER

Tix: WDIC/XW/0005/2022 31/ 12 /2022

**Ku: Garyaqaanka Guud ee Dowladda Federaal ka Soomaaliya**

**Og: Wasiirka Wasaaradda Deegaanka iyo Isbeddelka Cimilada**

**Og: Wasiiru-Dowlaha Wasaaradda Deegaanka iyo Isbeddelka Cimilada**

**Ujeedo: Soo Gudbin Siyaasadda Qaran ee Maaraynta Deegaanka iyo Hindise Sharciyeedka Maaraynta Deegaanka**

Wasaaradda Deegaanka iyo Isbeddelka Cimilada DFS oo gudanaysa Waajibaadka loo igmaday ee Ilaalinta Arrimaha Deegaanka Dalka iyo Latacalidda Isbeddelka Cimilada, waxay si qadarin leh ugu soo gudbinaysaa Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dowladda. Labada nuqul ee kala ah:

1. Siyaasadda Qaran ee Maaraynta Deegaanka
2. Hindise Sharciyeedka Maaraynta Deegaanka

Sidaa darteed, waxaanu ka codsanynaa Xafiiska Garyaqaanka Guud inuu ka guto Waajibaadkiisa Shaqo.

Shaqo wacan,

**Dr. Saciid Maxamed Cali**

Wasiir ku xigeenka
Wasaaradda Deegaanka & Isbeddelka Cimilada
Dawladda Federaalka Soomaaliya

WASAARADDA DEEGAANKA & ISBEDDELKA CIMILADA
MINISTRY OF ENVIRONMENT & CLIMATE CHANGE
MOECC

**Address:** Villa Somalia, Mogadishu - Somalia
**Email:** Deputyminister@moecc.gov.so

Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
Golaha Aqalka Sare ee BFS
Xafiiska Guddoomiyaha

جمهورية الصومال الفيدرالية
مجلس الشيوخ
مكتب الرئيس

Federal Republic of Somalia
The Upper House
Office of The Speaker

Tix: XG/092/B-11/23

Taariikh: 27/08/2023 :التاريخ

Ku:- Guddoomiyaha Golaha Shacabka BFS =Muqdisho=
Og:- Guddiga Kheyraadka Qaranka Aqalka Sare =Muqdisho=
Og:- Wasaaradda Deegaanka iyo Isbeddelka Cimillada XFS =Muqdisho=
Og:- Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dowladda =Muqdisho=
Og:- Guddoomiye ku xigeennada Aqalka Sare =Muqdisho=
Og:- Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya =Muqdisho=

**Ujeeddo:**

**Gudbin Qaraar Gole (Ansixinta Sharciga Ilaalinta iyo Maareynta Deegaanka.)**

Mudane Guddoomiye,

Salaan diirran kadib, waxaan halkan kuugu soo gudbinayaa Qaraarka Golaha Aqalka Sare ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya ee tirsigiisu yahay **Tix: GAS/B-11/KF3/12/2023** kuna taariikheysan **26ka Agosto, 2023** uuna Goluhu ku ansixiyay **Sharciga Ilaalinta iyo Maareynta Deegaanka:**

- Waxaa soo xaadiray **33 Senator.**
- Waxaa codeeyay: **33 Senatar.**
- Waxaa oggolaaday: **33 Senatar.**
- Waxaa diiday: **Ma jiro.**
- Waxaa ka aamusay: **Ma jiro.**

Sidaas darteed, Mudane Guddoomiye, waxaa halkan ku lifaaqan Qaraarka Golaha Aqalka Sare ee kor ku xusan iyo nuqulka sharciga uu Goluhu soo ansixiyay si aad u gudataan waajibka dastuuriga ee la idiin igmaday.

Iga guddoon qadarin.

**Sen. Cabdi Xaashi Cabdullaahi**
**Guddoomiyaha Aqalka Sare**
**Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya**

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA / FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA / THE UPPER HOUSE / AQALKA SARE

# ANSIXINTA SHARCIGA ILAALINTA IYO MAAREYNTA DEEGAANKA

| Senatarrada Codeeyay | Oggolaaday | Diiday | Ka Aamusay |
|---|---|---|---|
| 33 | 33 | 0 | 0 |

| Guddoomiyaha Golaha Aqalka Sare ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya | |
|---|---|
| Sen. Cabdi Xaashi Cabdullaahi | Taariikh: 26 Agosto, 2023 |

| Guddoomiye Ku-xigeenka Koowaad ee Golaha Aqalka Sare Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya | |
|---|---|
| Sen. Cali Shacbaan Ibraahim | Taariikh: 26 Agosto, 2023 |

| Xoghayaha Guud ee Golaha Aqalka Sare Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya | |
|---|---|
| M.ne Cabdinaasir Ibraahim Guuleed | Taariikh: 26 Agosto, 2023 |

# JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA

## GOLAHA AQALKA SARE
## BAARLAMAANKA FEDERAALKA SOOMAALIYA

# QARAAR GOLE
# ANSIXINTA SHARCIGA "ILAALINTA IYO MAAREYNTA DEEGAANKA"

Muqdisho,
26 Agosto, 2023

**Tix**: GAS/B-11/KF3/12 /23 **Taariikh**: **26 Agosto, 2023**

Kalfadhiga 3aad

Kulankiisa **6aad**

## GOLAHA AQALKA SARE EE BAARLAMAANKA FEDERAALKA SOOMAALIYA

**MARKUU AKHRIYAY:**

Sharciga "**Ilaalinta iyo Maareynta Deegaanka**" oo ay nuqulkiisii kowaad soo curisay Xukuumadda Federaalka Soomaaliya uuna soo ansixiyay Golaha Shacabka ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya soona gaaray Golaha Aqalka Sare **13 Maarso 2023** si uu uga guto waajibka dastuuriga ah ee loo igmaday.

**MARKUU ARKAY:**

**Qod.82aad** iyo **Qod.83aad** ee Dastuurka KMG ah iyo **Qod.50aad** iyo **Qod.51aad (4)** ee Xeer Hoosaadka Golaha Aqalka Sare.

**MARKUU ARKAY:**

**Qod.61aad (1) (3)** ee Dastuurka KMG ah.

**MARKUU TIXGELIYAY:**

Sida wanaagsan ee uu Guddiga Kheyraadka Qaranka, Kaabeyaasha Dhaqaalaha iyo Gaadiidka ee Golaha Aqalka Sare uga soo shaqeeyay Sharciga **Ilaalinta iyo Maareynta Deegaanka.**

**MARKUU GAROWSADAY:**

In danta guud ee Dalku ku jirto meel marinta Sharciga **Ilaalinta iyo Maareynta Deegaanka**.

**ISAGA OO KU KULANSAN:**

Kalfadhiga **3aad**, kulankiisa **6aad**, oo ay soo xaadireen **33 Senatar** (Soddon iyo seddex Senator).

## WUXUU GUDDOONSADAY QODOBADA HOOS KU XUSAN:

### Qod.1aad

### ANSIXINTA SHARCIGA

Golaha Aqalka Sare wuxuu cod aqlabiyad leh ku ansixiyay Sharciga **Ilaalinta iyo Maareynta Deegaanka** isaga oo wax-ka-beddel ku sameeyay, ma jirin cid diiday iyo cid ka aamustayba

### Qod.2aad

### GUDBINTA QARAARKA GOLAHA AQALKA SARE

Qaraarka Golaha Aqalka Sare waxaa loo gudbinayaa Golaha Shacabka ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya.

**Sen. Cabi Xaashi Cabdullaahi**
**Guddoomiyaha Golaha Aqalka Sare**
**Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya**

# JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
# BAARLAMAANKA FEDERAALKA SOOMAALIYA
# GOLAHA AQALKA SARE

# SHARCIGA ILAALINTA IYO MAAREYNTA DEEGAANKA

Muqdisho,

26 Agosto, 2023

## Cutubka 1aad

## Qodobo Guud

### Qodobka 1aad

### Magaca Sharciga

Sharcigan waxaa lagu magacaabaa Sharciga Maareynta Deegaanka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

### Qodobka 2aad

### Qeexidda Ereyada

Si loo fahmo macnaha guud ee sharcigan, Ereyada soo socda waxa ay yeelanayaan macnaha (fasiraadda) ku hor qoran.

1. **Tayada Hawada** waxa loola jeedaa hawadu sida ay tahay marka la cabbiro wasakhda ku jirta sida uu Sharcigani dhigayo.
2. **Baaris** waxaa loola jeedaa baarista curiye ama walxaha si loo ogaado waxa ay ka samaysanyihiin (koobanyihiin) iyo tayadooda, isla markaana la hubiyo saamaynta ay ku yeelan karaan qayb ka mid ah deegaanka. Waxa kale oo ka mid ah baadhista waxyaabaha hawada lagu sii daayo, diiwaangalinta dhawaqa/codka ama gariirka si loo ogaado heerka codka ama gariirku uu gaarsiisan yahay iyo saamaynta uu ku yeelan karo deegaanka.
3. **Deegaan biyood**: waxa loola jeedaa deegaan biyoodka ay ka mid yihiin baddaha, webiyadda, harooyinka, biyaha dhulka hoostiisa, iwm.
4. **Wasakheynta Hawada**: waxaa loola jeedaa badelidda tooska ah ama mid dadban ee lagu sameeyo qaabka dabiiciga ah ee hawada iyadoo lagu sii daynayo qiiq (qaac), gaas, shucaac, ur ama wasakh kale.
5. **Dhuxul**: waxaa loola jeedaa dhirta la shido is la markaana loo adeegsado tamar wax lagu karsado.
6. **Kiimiko:** waxaa loola jeedaa nooc kasta oo walxaha kiimikooyinka ah, kuwaas oo la warshadeeyay ama si dabiiciya loo sameeyay, waxaana ka mid ah kiimikooyinka warshadaha, sunta cayayaanka, bacriminta iyo daawooyinka.
7. **Dastuur:** waxa loola jeedaa Dastuurka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.
8. **Maxkamad:** waxa loola jeedaa maxkamadaha ku xusan qodobka 86aad ee Sharcigan.
9. **Farsameynta Qashinka:** waxa loola jeedaa ururinta, qaadidda, kaydinta, farsamaynta iyo in qashinka la geeyo goobta loogu tallo galay.



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

10. **Hannaan Deegaameedka Dabiiciga ah** (Ecosystem) waxaa loola jeedaa is-dhexgalka/xiriirka noolaha dhexdooda iyo sidoo kale deegaanka ma noolaha ah ee ku gadaaman.
11. **Noolaha Dabargo'aya (endangered species):** waxa loola jeeda noole kasta oo sii darbargo'aya kaas oo gabi ahaan ama qayb ka mid ah ay meesha ka baxayso (aan dib loo arkayn).
12. **Deegaan:** waxa loola jeedaa dhamaan waxyaabaha inagu xeeran sida dhulka, biyaha, hawada dhulka ku xeeran, cimilada, codka, urta, dhadhanka, xaaladaha abuurista ee xayawaanka iyo dhirta, deegaanka dabiiciga ah iyo ka dadku ay sameeyeen.
13. **Hubinta/Dhawrista Deegaanka:** (Environmental Audit) waxa loola jeedaa in si nidaamsan oo dhexdhexaad ah loo qiimeeyo sida ay haya'ddaha maareynta deegaanku u gudanayaan hawlaha ilaalinta iyo daryeelka deegaanka.
14. **Qiimeynta Saameynta Deegaanka iyo Bulshada:** waxaa loola jeedaa in si nidaamsan loo baaro sidii loo ogaan lahaa saamayn ama raad reeb barnaamij, hawl ama mashruuc uu ku yeelanayo karo deegaanka iyo bulshada.
15. **Maareynta Deegaanka:** (Environmental Management) waxaa ka mid ah ilaalinta iyo daryeelka iyadoo si joogtaysan (sustainable) loo isticmaalayo qaybaha deegaanka.
16. **Kormeeridda Deegaanka:** (Environmental Monitoring) waxa loola jeedaa in si joogta ah ama wakhtiyo kala duwan loo kormeero deegaanka si loo ogaado saameynta soo gaadhay ama soo gaadhi karta deegaanka wakhtiga dhaw iyo wakhtiga fog labadaba.
17. **Macluumaadka Deegaanka**: waxaa loola jeedaa macluumaadka ku saabsan deegaanka ee Sharcigani uu dhigayo ama xeerarka kale ee ku saabsan ilaalinta deegaanka.
18. **Sarkaal Deegaan:** waxa loola jeedaa sarkaalka la magacaabo sida uu dhigayo qodobka 20aad ee Sharcigan.
19. **Ilaha biyaha macaan:** waxaa ka mid ah harooyinka, webiyada, ceelasha biyaha, dooxyada, dhulka qoyan iyo ilaha kale ee biyaha macaan;
20. **Dowlad** waxa loola jeedaa Dowladda Federaalka Soomaaliya ama Maamul Goboleedyada.
21. **Saameyn ba'an":** waxa loola jeedaa saameynta wasakhda hawada, jabaqda, gariirka, shucaaca, wasakhaynta biyaha, carrada iwm.



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA · FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA · THE UPPER HOUSE · AQALKA SARE

22. **Qashinka halista ah:** waxa loola jeeda qashinka adkaha, dareeraha, gaas (hawo), kiimikooyinka, qashinka nukliyeerka iyo qashin kasta oo khatar ku ah caafimaadka dadka ama waxyeelayn kara deegaanka;
23. **Saameyn:** waxaa loola jeedaa saameynta ka dhalan karta isticmaalka, horumarinta deegaanka oo waxaa ka mid ah saameyn wanaagsan ama mid waxyeelo leh, saameyn ku meel gaadh ah ama mid wakhti dheer taagnaanaysa, saameyn hore, mid hada taagan iyo mid mustaqbalka dhici karta.
24. **Khabiir madax banaan:** waxa loola jeedaa qof ka madax banaan ama aan xidhiidh la lahayn qofka raba in uu mashruuc fuliyo. Khabiirku waa qof aqoon u leh hawsha loo igmaday, soona bandhigi kara fikir cilmiyaysan oo ku saabsan saameynta uu mashruuc ku yeelan karo deegaanka;
25. **Dhisme Warshadeed (installations):** waxaa loola jeedaa dhisma warshadeed kasta **mid yar iyo mid weyn**
26. **Wasaaradda ama Wasaaraddaha ay Khuseyso** waxa loola jeedaa
    - **b)** Heer Federaal waa wasaaradaha kala duwan ee Federaalka
    - **t)** Heer Maamul Goboleed waa wasaaradaha deegaanka,
27. **Ruqsad/Shati** waxaa loola jeedaa ruqsad (ogolaansho) la bixiyay iyadoo la raacayo Sharcigan ama xeer kale oo dalka ka jira;
28. **Deegaan Badd~~d~~eed:** waxa loola jeedaa deegaanka badda kaas oo ka kooban noolaha iyo ma noolaha ku jira badda;
29. **Wasaarad** waa Wasaaradda Deegaanka iyo Isbaddelka Cimilada ee JFS **iyo Wasaaradaha Deegeenka DXDF.**
30. **Kheyraadka Dabiiciga ah:** waxaa ka mid ah kheyraadka hawada, dhulka, biyaha, xayawaanka, dhirta oo ay ku jiraan tayadooda iyo bilicdoodu.
31. **Jabaq/dhawaq**: waxa loola jeedaa jabaq (sawaxan) kasta oo la dhibsanayo kaas oo keeni kara saameyn caafimaad ama deegaan;
32. **Sunta Cayayaanka**: waa kiimikooyinka loo isticmaalo in lagu dilo (laayo) cayayaanka dhirta**,** beeraha **iyo noolaha.**
33. **Qof:** waxa loola jeeda qof dabiici ah (natural person) ama shirkad (juridical person);
34. **Ugaarsiga Sharci Darrada ah:** waxaa loola jeedaa ugaarsiga duur joogta ee aan ogolaansho loo haysan kaas oo ka hor imanaya shuruucda dalka iyo kuwa caalamiga ah, waxaana **ka mid ah** ficilada ugaarsiga qabashada, dabin u dhigidda ama dilka xayawaanka duurjoogta ah.



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

35. **Qaadista Masuuliyadda Waxyeelleynta Deegaanka**: waxa loola jeedaa bixinta kharashka lagu nadiifinayo deegaanka la wasakheeyay, bixinta magadhaw la siinayo dadka ay dhibaatadu ka soo gaadhay wasakhaynta, bixinta khasaaraha ama kharashaadka kale ee la xiriira wasakhaynta la sameeyay. Waxaas oo kharash ah waxaa bixinaya qofka lagu helo in uu wasakheeyay deegaanka sida uu Sharcigani dhigayo.
36. **Wasakhayn** (Pollution) waxa loola jeedaa badelidda tooska ah ama sida dadban loogu sameeyo qaabka, muuqaalka, kiimikooyinka, abuurka iyo dabeecadaha deegaanka iyadoo lagu sii daynayo/lagu shubayo wasakh waxyeellayn karta caafimaadka dadweynaha, xayawaanka, shimbiraha, duurjoogta, kalluunka, noolaha biyaha iyadoo lagu xadgudbay shuruudaha ogolaansho/ruqsad ee Sharcigan.
37. **Goobaha Dadweynaha:** waxaa loola jeedaa xaafadaha la degan yahay, suuqyada, **goobaha waxbarashada, Goobaha Caafimaadka,** goobaha kale oo ay dadku isugu yimaadaan **iwm.**
38. **Goobaha la ilaaliyay (protected areas)** waa goob juqraafi ahaan cayiman ama la qeexay, sharci ahaanna loo aqoonsaday in la sameeyo taas oo ujeedadu tahay daryeelka iyo ilaalinta noolaha iyo guud ahaan deegaanka.
39. **Mabda'a Taxaddarka** (Precautionary Principle) waa mabda' ku saabsan haddii ay jirto halis ku soo fool leh deegaanka, ha ahaato mid daran ama aan wax laga qaban karin, ama haddii la la'yahay cadayn saynis ama cilmi ku saabsan halistaas, cudurdaar uma noqon karto in dib loo dhigo qaadidda tallaabooyin wax ku ool ah oo lagu baajinayo tayo dhaca/burburka deegaanka.
40. **Dhisme** (Premises) waxaa ka mid ah dhismayaasha, dhulka, hanti kasta oo la kala dhaxli karo, mashiinnada, warshadaha oo ay ku jiraan baabuurta loo isticmaalo ganacsiga dhismaha ka socda.
41. **Mashruuc** waxaa ka mid ah hawl qabad kasta, fikir ganacsi, barnaamij ama siyaasad la xidhiidha mashaariic saameyn ku yeelan kara deegaanka.
42. **Warbixinta Mashruuca**:waxa loola jeedaa warbixin kooban oo tibaaxaysa saamaynta ay deegaanka ku yeelan karaan mashaariic horumarineed.
43. **Ilaalinta Deegaanka** waxa loola jeedaa in la dhawro qaab dhismeedka dabiiciga ah ee deegaanka is la markaana kheyraadka si haboon loo isticmaalo si loo ilaaliyo danaha jiilka maanta jooga iyo kuwa mustaqbalka;
44. **Shucaac** waxa loola jeedaa shucaac kasta oo halis ku ah caafimaadka dadka iyo deegaanka;



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA THE UPPER HOUSE

45. **Gobol** waxa loola jeeda Gobolada Soomaaliya sida uu qorayo Dastuurka Dalka;
46. **Wasaaradaha Waaxyaha** (Sectoral Ministries) waa Wasaaradaha kala duwan ee dowladda Federaalka Soomaaliya.
47. **Heer ama Halbeeg** (Standard) waxa loola jeedaa xadka wasakh ee biyaha ama hawada lagu sii dayn karo sida uu Sharcigani ama xeerar kale ay dhigayaan.
48. **Walax** waxa loola jeedaa kiimikooyinka, qashinka, neef, daawo, iwm.
49. **Horumarka Joogteysan** waxa loola jeedaa in si isku dheelli tiran looga faa'idaysto khayraadka deegaanka horumarna ay u gaadhaan jiilka hadda jooga si ay baahidooda u daboolaan ha yeeshee aanay waxyeello gaadhsiin jiilalka mustaqbalka sidii ay iyaguna baahidooda u dabooli lahaayeen.
50. **Qashin** waxaa ka mid ah nooc kasta oo **haraa** ah sida **mid** dareere ah, **mid** adag, **mid** neefta ah , ama shucaaca kuwaas oo lagu sii daayo ama lagu shubo deegaanka waxyeello ama isbadel ku keeni kara deegaanka.
51. **Duurjoog** waxaa loola jeedaa nooc kasta oo xayawaan **ah** kaas oo laf dhabar leh ama aan laf-dhabar la hayn, xayawaanka duurka ku nool, kuwa lagu hayo goobaha xayawaanka lagu dhaqaaleeyo (tusaale: beer xayawaan), xayawaanka waddamada iskaga goosha, muunad duurjoog ama qayb ka mid ah jirka duurjoogta sida ugxaanta, dhogorta, baalasha iwm, **balse,** waxaan ku jirin xoolaha la dhaqdo, xayawaanka la carbiyo sida bisadaha.
52. **Xayawaanka Halista ku Sugan** (threatened species) waa noocyada xayawaanka ay suurta galka tahay in mustaqbalka gabi ahaan ama qayb ka mid ah ay darbargo'aan.
53. **Farsamayn** waxa loola jeedaa farsamaynta qashinka (adkaha iyo dareeraha);

## Qodobka 3aad

## Hirgalin/Dabaqid

Sharcigani wuxuu ka shaqaynayaa dhamaan dhulka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

## Cutubka 2aad

## Mabaadi'da Guud iyo Ujeeddooyinka Sharciga

### Qodobka 4aad

### Mabaadi'da Sharciga

Mabaadi'da Sharcigani waxa ay la mid yihiin mabaadi'da Siyaasadda Qaran ee Maareynta Deegaanka.

### Qodobka 5aad

### Xaqa Deegaan Nadiif ah

1. Qof kastaa waxa uu xaq u leeyahay in uu ku noolaado deegaan nadiif ah, amaan ah oo caafimaad qaba.

### Qodobka 6aad

### Maareynta Qashinka

1. Qashinka waa in la yareeyo, oo intii suurtagal ah dib loo warshadeeyo (farsameeyo).
2. Waa in la raacaa nidaamka (3 R – Reduce, Re-use, Recycle): Yaree, Dib-u-isticmaal, Dib-u-farsamee.
3. Qashinka waa in loo maareeyaa si aan deegaanka wax u dhimayn.

### Qodobka 7aad

### Qaadista Masuuliyadda Waxyeelleynta Deegaanka

1. Qofkii deegaanka wasakheeya ayaa bixinaya dhaqaalaha lagu hagaajinayo.
2. Ciddii deegaanka wasakhaysa ayaa masuul ka ah in ay bixiso magdhaw la siinayo cidda ay dhibaato ka soo gaartay.

### Qodobka 8aad

### Qiimaynta Saameynta Deegaanka iyo Bulshada

1. Qiimeynta Saameynta Deegaanka iyo bulshadu waa nidaam loo baaroo sidii loo ogaan lahaa, saameyn ama raad reebka barnaamij, hawl ama mashruuc uu ku yeelan karo deegaanka.
2. Qiimeynta Saameynta Deegaanka iyo bulshada waa in la sameeyaa iyadoo la raacayo Cutubka 11aad ee Sharcigan.

### Qodobka 9aad

### Horumarka Waara

1. Horumarka waara waa in si isku dheelli tiran looga faa'idaysto kheyraadka deegaanka, horumarna ay u gaaraan jiilka (generation) hadda jooga si ay



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE

baahidooda u daboolaan, ha yeeshee aanay waxyeello gaarsiin jiilalka mustaqbalka sidii ay iyaguna baahidooda u dabooli lahaayeen.

2. Ka faa'idaysiga kheyraadka Soomaaliya, waa in uu noqdaa mid waafaqsan mabda'a Horumarka Waara.

## Qodobka 10aad

## Mabda'a Taxadar ka

Haddii ay jirto halis ku soo fool leh deegaanka, ha ahaato mid daran ama aan wax laga qaban karin, maqnaashaha caddayn saynis ama cilmi ku saabsan halistaas, cudurdaar uma noqon karto in dib loo dhigo qaadidda tallaabooyin wax ku ool ah, oo lagu baajinayo ama lagaga hortagaayo burburka deegaanka.

## Qodobka 11aad

## Ujeedooyinka Sharcigan

Ujeedooyinka Sharcigani waa:

1. In la horumariyo, lagana shaqeeyo sidii dadka Soomaaliyeed u heli lahaayeen deegaan nadiif ah oo caafimaad qaba.
2. In laga hortago, la xakameeyo, lala socdo, waxna laga qabto, wasakhaynta iyo burburka deegaanka;
3. In kor loo qaado fahanka deegaanka iyo kheyraadka dabiiciga ah ee muhiimada ugu fadhiya Qaranka Soomaaliyeed;
4. In wasakhaynta saamaynta daran, laga ilaaliyo dadka, biyaha, carrada, xayawaanka, dhirta, hawada iyo noolaha kala duwan;
5. In la qaado tallaabooyinka ku haboon ee lagu maareynayo kheyraadka dabiiciga ah iyo sidii loo soo noolayn lahaa (loo hagaajin lahaa) deegaanka la waxyeeleeyay;
6. In la dhiiri galiyo nidaamka horumarka waara;
7. In la yareeyo qashinka, isla markaana la horumariyo in si haboon loo maareeyo qashinka;
8. In la qeexo qaab-dhismeedka Dowladda ee maareynta deegaanka ee heer Federaal iyo Dowlad Goboleed;
9. In la xoojiyo sidii Soomaaliya ay caalamka iyo waddamada kale ugala shaqayn lahayd arrimaha deegaanka.
10. **In si taxadder leh loo qiimeeyo waxyeellada ka soo gaari karta deegaanka soo saarista shidaalka iyo macdanta."**

## Cutubka 3aad

## Qaab-dhismeedka Maamulka Deegaanka

## Qodobka 12aad

## Wasaaradda Deegaanka iyo Isbaddelka Cimilada

1. Wasaaradda Deegaanka iyo Isbaddelka Cimilada ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya ayaa ah hay'ada Qaran ee masuulka ka ah ilaalinta deegaanka Dalka iyo wax ka qabashada isbaddelka cimilada.
2. Masuuliyadaha Wasaaradda waxaa ka mid ah:

b) Hogaaminta, kor u qaadidda wada shaqaynta iyo maamul wanaaga ee ilaalinta, daryeelka iyo ka faa'idaysiga kheyraadka deegaanka;

t) Dejinta siyaasaddaha, istiraatajiyadda, xeerarka iyo halbeegyada deegaanka, isla markaana hubinta sidii loo heli lahaa qaab lagu horumariyo bulshada iyo dhaqaalaha oo aan waxyeello u gaysanayn dadka iyo deegaanka;

j) Hogaaminta iyo hubinta sidii loo dhaqan gelin lahaa siyaasaddaha, Xeeladaha (strategy), xeerarka lagu ilaalinayo deegaanka.

x) Qiimeynta iyo korjoogteynta arrimaha deegaanka ee heer Federaal iyo heer Maamul Goboleed.

kh) Wasaaraddu iyadoo la tashaneysa Wasaaradaha deegaanka ee Dowlad Goboleedyada, waxa ay diyaarinaysaa dib u eegista iyo cusboonaysiinta Siyaasaddaha, Xeeladaha strategies), iyo Xeerarka deegaanka.

d) Dejinta nidaamka Qiimeynta, Saameynta Deegaanka iyo Bulshada ee dhamaan mashaariicda iyo barnaamijyada saameyn ku yeelan kara deegaankaasi, tixgelin loo siiyo arrimaha deegaanka iyo bulshada oo ay uga mid noqdaan qorshayaasha, siyaasaddaha iyo barnaamijyada lagu horumarinayo tayada nolosha dadka;

r) Wasaaraddu iyadoo la kaashanaysa hay'adaha ay khuseyso ee heer Federaal iyo Dowlad Gobolleed, waxa ay fulinaysaa daraasado ku saabsan xaalufinta dhirta iyo dabargo'a duurjoogta iyo sidii wax looga qaban lahaa iyadoo la diyaarinayo tallaabooyin wax lagaga qabanayo;

s) Fulinta daraasadaha iyo faafinta cilmi baarista ku saabsan xaaladda deegaanka ee Dalka.

sh) Matalaada, la talinta Dowladda iyo fulinta baaqyada, habmaamuuska (protocols) iyo heshiisyadda ku saabsan deegaanka ee heer gobol iyo heer caalami;

dh) Wasaaraddu iyadoo la tashanaysa Hay'ada ay khuseyso ee heer Federaal iyo Dowlad Goboleedyada, waxa ay abuuraysaa nidaamka xog-uruurinta, maareynta iyo isticmaalka xogaha ku saabsan deegaanka iyo isbaddelka cimilada;



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE

c) Dhiirigelinta ka qeybgal wax ku ool ah oo ay bulshadu kaga qayb gasho ilaalinta deegaanka, iyadoo la adeegsanayo wacyigelin ballaaran iyo waxbarasho;

g) Abaabulka iyo la socodka ilaha dhaqaale ee lagu maareynayo deegaanka iyo kheyraadka dabiiciga ah.

f) Fulinta dhamaan arrimaha khuseeya deegaanka iyo isbaddelka cimilada ee Dalka.

q) Diiwaangelinta dhamaan hay'adaha aan dowliga ahayn ee ka shaqeeya arrimaha deegaanka iyo isbaddelka cimilada.

k) Wasaaraddu waxa ay soo saari kartaa xeer-nidaamiyeyaal fududeynaya fulinta sharcigan.

## Qodobka 13aad

## Dhaqaalaha Deegaanka

1. Sharcigani waxa uu abuurayaa sanduuq dhaqaale oo lagu daryeelo Deegaanka (Environmental Trust Fund).
2. Ilaha dhaqaalaha sanduuqu waxa ay ka koobnaan doonaan:

   (b) Miisaaniyadda ama dhaqaalaha ay Dowladda Federaalku u qoondayso deegaanka;

   (t) Taageerada dhaqaale ee ka timaada hay'adaha caalamiga ah, deeq-bixiyayaasha iwm.

   (j) Khidmadaha la qaado sida ku xusan Sharcigan ama xeer-nidaamiyeyaasha ka arcama Xeerkan;

   (x) Ganaaxyada laga qaado jebinta qodobada Xeerkan iyo shuruucda hoos timaada;

   (kh) Deeqaha iyo qaaraanka meelo kale kasoo xerooda.
3. Wasaaradda ayaa mas'uul ka ah maamulka Sanduuqa.
4. Dhaqaalaha deegaanka waa in loo isticmaalaa fulinta waajibaadka Wasaaradda.
5. Dhaqaalaha deegaanka waa in loo maareeyaa si waafaqsan Nidaamka Maareynta Maaliyadda Dowladda (Public Financial Management).
6. Wasaaraddu waa in ay keydisaa xisaab xidh dhameystiran (sax ah) oo ku aadan maareynta sanduuqa.
7. Xafiiska Hanti-dhawrka Guud ayaa sanadkii mar hubinaya xisaabaadka sanduuqa.



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

## Qodobka 14aad

## Guddiga Qaran ee Deegaanka

1. Si ay u fududaato hirgelinta sharcigan, waa in la aasaasaa Guddiga Qaran ee Deegaanka, kaas oo ka kooban:

   b) Gudoomiye (Wasiirka Deegaanka iyo Isbaddelka Cimilada, JFS);

   t) Xubno ka socda wasaaradaha/hay'adaha ay khuseyso ee Dowladda Federaalka;

   j) Xubno (min hal xubin) oo ka socda Wasaaradaha Deegaanka ee Maamul Goboleedyada;

   x) Xubin ka socota ururada aan dowliga ahayn ee ku hawllan deegaanka;

   kh) Xubin ka socota ururka shaqaalaha;

   d) xubin ka socota Rugta Ganacsiga Soomaaliya;

   r) Qareen ka socda Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dowladda

   s) Xubno ka **kala** socda **Guddiyada** Khayraadka iyo bay'ada **labada Aqal ee** Baarlamaanka JFS.

   sh) xubno kale haddii loo baahdo.

## Qodobka15aad

## Waajibaadka Guddiga Qaran ee Deegaanka

1. Guddigu wuxuu:

   b) Talooyin ka bixinayaa himilooyinka Qaranka, ujeeddooyinka, siyaasadaha iyo shuruucda ilaalinta deegaanka;

   t) Guddigu isagoo fiirinaya warbixinta ay u soo gudbiso Wasaaraddu, waxa uu samaynayaa qiimeyn isagoo soo jeedinaya tallooyinka ku habboon sidii loo hirgelin lahaa siyaasaddaha iyo shuruucda deegaanka ee Soomaaliya;

2. Shirarka caadiga ah ee Guddigu waa lixdii biloodba mar, laakiin Guddigu wuxuu qaban karaa shirar aan caadi ahayn marka loo baahdo.

## Qodobka 16aad

## Wasaaraddaha Waaxyaha (Sectoral Ministries)

1. Shuruucda maareynta deegaanka ee heer Qaran ayaa ka sarreeya kuwa ku kooban waax (sector);

2. Wasaaraddu waxa ay yeelaneysaa sarkaal xiriiriya oo mas'uul ka ah iskuxirka wasaaraddaha waaxyaha iyo hubinta ku dhaqanka sharcigan iyo xeerarka kale ee deegaanka.



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

## Qodobka 17aad

## Wasaaraddaha Deegaanka ee Maamul Goboleedyada

1. Maamul Goboleed kastaa waxa uu yeelanayaa Wasaarad ama Hay'ad Deegaan taas oo u qaabilsanaan doonta arrimaha deegaanka ee dowlad Goboleedka iyo dhaqan gelinta Siyaasadda iyo Xeerarka Qaran ee Maareynta Deegaanka ee heer Federaal iyo heer Dowlad Goboleed;
2. Wasaaradda deegaanka ee Maamul Gobolleedku waxa ay masuul ka noqonaysaa isku dubbaridka (xiriirinta), diyaarinta, dhaqan gelinta, dib u eegista Siyaasaddaha, Xeeladaha (strategies) iyo Xeerarka Dowlad Goboleedka ee ilaalinta deegaanka;
3. Wasaaradda Deegaanka ee Maamul Goboleedku waa in ay hubisaa dhaqan gelinta halbeegyada deegaanka ee dowladda Federaalka;
4. Siyaasadaha iyo xeerarka deegaanka ee Dowlad Goboleedyadu waa in ay waafaqaan kuwa heer Federaal;
5. Faqradda 4aad ee qodobkan isagoo sidiisa ah, Dowlad Goboleedyadu waa in ayna soo saarin heerar deegaan (environmental standards) oo ka khafiifsan (less stringent) kuwa Federaalka;
6. Haddii ay is khilaafaan shuruucda deegaanka ee heer Federaal iyo kuwa Dowlad Goboleedyadu, waxaa la raacayaa kuwa heer Federaal;
7. Wasaaraddaha deegaanka ee Maamul Gobolleedyadu iyo **Wasaaradda Deegaanka ee XFS waa in ay mar walba ka wada tashadaan sidii la isku waafajin lahaa xeerarka deegaanka ee labada heer.**



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE

## Cutubka 4aad

## Hubinta Dhawrista Deegaanka iyo Kormeerka

### Qodobka 18aad

### Dabagalka Dhawrista Deegaanka (Environmental Audit)

1. Wasaaradda ayaa masuul ka ah in ay hubiso wax kasta oo saameyn ku yeelan kara deegaanka.
2. Milkiilaha dhismaha ama masuuliyiinta mashaariic fulinaya waa in ay kaydiyaan diiwaan sax ah, iyagoo warbixin sannadle ah u gudbinaya Wasaaradda si ay ula socodsiiyaan sida ay isku waafaqsanyihiin mashruuca iyo daraasadda lagu qiimeeyay, saamaynta deegaanka uu ku yeelanayo sida ku xusan qodobada Cutubka 11aad ee Sharcigan.
3. Milkiilaha dhismaha ama masuuliyiinta mashaariicda fulinaya waa in ay qaadaan tallaabo kasta oo lagu yaraynayo waxyeellaynta deegaanka.

### Qodobka 19aad

### Kormeeridda Deegaanka (Environmental Monitoring)

1. Wasaaraddu, iyadoo la tashanaysa wasaaraddaha ay khuseyso waa in ay kormeertaa:-

   **B**. Deegaanka si ay u qiimeyso is baddelada ku iman kara deegaanka iyo saameyntooda.

   **T**. Hawlaha warshaddaha, mashaariicda ama hawlaha kale si ay u ogaato samaynta dhaw iyo tan fog labadaba.
2. Sarkaalka deegaanka ee ku xusan qodobka 20aad ee Sharcigan, waxa uu awood u leeyahay in uu galo dhul ama dhisme kasta si uu kormeer ugu sameeyo hawlaha halkaas ka socda.

### Qodobka 20aad

### Saraakiisha Deegaanka

1. Wasaaraddu waxay qoraal ahaan ku magacaabi kartaa qofka ay u aragto in uu aqoon u leeyahay in uu noqdo Sarkaal Deegaan. Sarkaal Deegaan waxa noqon kara shaqaalaha Wasaaradda, Booliska, kormeerayaasha caafimaadka bulshada iyo qofkii kale ee aqoon u leh arrimaha deegaanka.
2. Agaasimaha Guud iyo dhamaan saraakiisha Wasaaradda iyo Wasaasaradaha Deegaanka ee Maamul Goboleedyada ee heysta jagooyin waqti buuxa ah (full-time employees) waxa ay yihiin saraakiil deegaan.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA THE UPPER HOUSE

## Qodobka 21aad

## Awooddaha Sarkaalka Deegaan

1. Iyadoo la tixgelinayo faqradda 2aad & 3aad ee qodobkan, sarkaalka deegaanku.
   b) Waxa uu gali karaa dhul ama dhismayaasha aan la deganayn ama aan la degganeyn wakhtiga loo baahdo;
      i. Waxa uu gali ama kori karaa, doon, markab, diyaarad, baabuur ama gaadiid nooc kale ah, **iyada oo ujeeddadu tahay**
      ii. Kormeeridda ficil laga shaki qabo in uu saameyn ku yeelan karo deegaanka;
      iii. Baaridda fal dambiyeed deegaan ama ku xad gudub shuruucda ilaalinta deegaanka;
      iv. Dhaqan gelinta Sharcigan iyo shuruucda kale ee ilaalinta deegaanka.
2. Sarkaalka deegaanku waxa uu adeegsan karaa oo kaliya awooddaha ku xusan faqradda 1aad (b) ee qodobkan, si loo baaro fal dambiyeed deegaan oo laga shaki qabo in la gaystaa, taas oo la aaminsan yahay ama ay macquul tahay haddii dhulka ama dhismaha la galo in la heli doono caddayn.
3. Awooddaha ku xusan faqradda 1aad (b) lama adeegsan karo ilaa milkiilaha ama qofka deggan/masuulka ka ah la siiyo ogeysiis wakhti macquul ah ama waa in gelintaanka dhulka/dhismaha loo haysto waaran maxkamadeed.
4. Helitaanka waaranka maxkamadeed waxaa lagu dabaqi doonaa qodobada Hab-raaca Xeerka Habka Ciqaabta ee Soomaaliya;
5. Si uu u fuliyo awoodaha ku xusan qodobkan, Sarkaalka deegaanku waxa uu:
   b. Sameyn karaa baaritaanada loo baahan yahay si uu ula socdo saameynta falka ama ficilka la sameeyay;
   t. Qaadi karaa muunado (samples) si loo tijaabiyo (baaro);
   j. Qaadi karaa sawirro ama cabbiraado;
   x. Waxa uu waydiin karaa magaca, shaqadiisa iyo halka uu degan yahay qof kasta oo u muuqda ama looga shakiyo in uu ku lug leeyahay falka la baarayo;
   kh. Waxa kale oo uu waydiin karaa dokumentiyo iyo caddaymo kale sida ruqsadda meheradda iwm;
   d. Waxa uu qofka looga shakiyay falka ka dalban karaa la shaqayn iyo gacan siin si uu hawshiisa u guto; iyo
   r. Waxa uu la wareegi karaa (soo qaadi karaa) shay kasta oo looga shakiyay in loo adeegsaday ama uu qayb ka ahaa fal dambiyeedka deegaan ee la baarayo.
6. Qof kasta oo -

b. Carqaladeeya ama horjoogsada Sarkaalka Deegaanka ee ku guda jira gudashada waajibaadkiisa sida ku xusan Sharcigan;

t. Kiciya ama abaabula dad kale si ay u horjoogsadaan ama u carqaladeeyaan shaqada Sarkaalka Deegaanka;

j. Iska dhiga in uu yahay Sarkaal Deegaan (been abuur);

d. U hoggaansami waaya codsiyada Sarkaalka Deegaanka ee ku xusan faqradda (5) (x), (kh) **iyo** (d); **ama**

x. U sheega ama u dhiiba Sarkaalka deegaan warbixin ama dokumenti been ah –

Qofkaasi waxa uu galay fal dambiyeed.



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

## Cutubka 5aad

## Macluumaadka Deegaanka

### Qodobka 22aad

### Waajibaadka bixinta Macluumaadka

1. Dhammaan milkiileyaasha ama hawlwadeennada warshadaha iyo ganacsiga kale ee wasakheyn kara deegaanka waa in ay ogeysiiyaan Wasaaradda soddon (30) maalmood gudahooda markuu dhaqan galo Sharcigan.
2. Milkiileyaasha ama hawlwadeennadu waa in ay Wasaaradda u gudbiyaan warbixin ku saabsan waxyaabaha wasakhda ah ee ay ku sii daayaan deegaanka;
3. Wasaaradda ay khuseyso waa in ay qaadaa tallaabooyinka ku habboon si waafaqsan Sharcigan.

### Qodobka 23aad

### Macluumaadka Deegaanka iyo Talo Bixin

1. Wasaaraddu waa in ay dadweynaha uga warbixisaa arrimaha la xiriira ilaalinta deegaanka iyo heerka wasakheynta deegaanka, gaar ahaan:

b) Waa in ay daabacdaa daraasadaha ku saabsan wasakheynta deegaanka iyo guulaha tallaabooyinka la qaaday;

t) Haddii ay danta guud ku jirta, waxaa la daabici karaa:
   i. Natiijooyinka Qiimeynta Saameynta Deegaanka iyo Bulshada
   ii. Natiijooyinka kormeerka warshadaha

2. Danta guud iyo ilaalinta sirta ganacsiga waa in mar kasta lagu dadaalaa.
3. Wasaaraddu waa in ay talo bixin siisaa hay'adaha dowladda, ganacsatada gaarka ah iyo dadweynaha. Waa in ay dadweynaha kula taliysaa ku dhaqanka wanaagsan ee ku aadan deegaanka iyo tallaabooyinka lagu yareynayo wasakheynta deegaanka.
4. Macluumaadka ku saabsan deegaanka waa in uu noqdaa mid lagau heli karo qaab online ah.

### Qodobka 24aad

### Warbixinta Deegaanka

Wasaaraddu waxa ay qiimaynaysaa xaaladda deegaanka Soomaaliya sanadkiiba mar. Waxa ay warbixinta u gudbinaysaa Golaha Xukuumadda iyo **Aqalka Sare iyo Golaha Shacabka ee Baarlamaanka JFS.**

## Qodobka 25$^{aad}$

## Xoriyadda Xogta iyo Macluumaadka Deegaanka

Qof kasta waxa uu xaq u leeyahay in uu helo macluumaadka deegaanka ee ay Dowladdu hayso;

## Cutubka 6$^{aad}$

## Wasakheynta Deegaanka

## Qodobka 26$^{aad}$

## Mabaadi'da

1. Wasakhowga hawada, jabaqda (shanqarta), gariirka iyo shucaaca waa in lagu xaddidaa goobahooda (at their sources).
2. Waa in si taxadar leh loo qaadaa tallaabooyin lagu yareynayo wasakhowga deegaanka **iyada oo la adeegsanayo** ~~ah~~ tiknoolajiyad~~a~~ **cusub.**
3. waa in tallaabooyin adag laga qaadaa sidii loo joojin lahaa wasakhda halista ah.

## Qodobka 27$^{aad}$

## Heerka ama Cabbirka Tayada Hawada

1. Wasaaraddu, iyadoo la kaashanaysa wasaraadaha ay khusayso waa in ay soo saartaa:
   a) Heerka tayo ee hawada guud
   b) Heerka tayada hawada goobaha la degan yahay
   c) Tayada hawada goobaha shaqo
   d) Heerka sii daynta qiiqa
   e) Tayada shidaalka gawaadhida/baabuurta
   f) Shuruudaha iyo tilmaamaha lagu xakamaynayo wasakhaynta hawada
2. Qof kasta oo siidaaya walxo wasakhaynaya hawada, kuna xadgudba heerarka Sharcigani dhigayo ama xeer ka sii farcamay waxa lagu qaadayaa dambi oo waxaa lagu xukumi xadhig aan ka badnayn laba sano ama ganaax u dhigma oo ay maxakamadda awoodda u leh go'aan ku gaarto ama labadaba.
3. Qofka lagu helo dambi sida ku xusan faqradda 2aad ee qodobkan waxaa kale oo lagu xukumayaa in uu:

   **B.** Bixiyo kharashka lagu sifeynayo hawada oo uu ku jiro kharashka ka baxay ciddda masuulka ka ah si ay dib ugu hagaajiso deegaanka la waxyeeleeyay.

**T**. Magdhaw ay maxkamadu go'aaminayso oo la siinayo cidii kale ee ay waxyeelo ka soo gaartay.

4. Si loo yareeyo wasakhowga hawada is la markaana loo dabaqo heerarka hawada ee la dajiyay, Hay'adaha awoodda u leh waxa kale oo ay qaadi karaan tallaabooyin lagaga dalbanayo dib u habayn (re-design) ku aadan warshadaha ama rakibidda teknoolajiyad cusub.

## Qodobka 28aad

## Ruqsadda Qaaca ama Qiiqa (Emission)

1. Marka uu Sharcigan dhaqan galo, milkiilaha ama masuulka meherad ganacsi, warshad ama goob kale oo sii daynaysa qiiq wasakhayn kara hawada, waa in uu qaataa ruqsadda oggolaashaha siideynta qiiqa ama qaaca.
2. Goobaha ganacsi iyo warshadaha sii jiray ka hor dhaqan galka Sharcigan, waa in ay laba iyo toban bilood gudohood ku codsadaan ruqsadda marka ay soo buuxiyaan shuruudaha sharcigan laga bilaabo maalinta uu Sharcigani dhaqan galo.
3. Wasaaraddu waa in ay samaysaa diiwaanka ruqsadaha qaaca, diiwaankaas oo ay hubin karaan cid kasta oo danaynaysa ka dib marka la bixiyo khidmadda ay Wasaaraddu qeexday.
4. Codsiga ruqsadda, khidmadda la bixinayo iyo qaabka loo qorayo waxaa qeexi doona xeer-nidaamiye.

## Qodobka 29aad

## Qiiqa noocyda Matoorrada

1. Milkiilaha ama masuulka gaari, tareen, markab, diyaarad, noocyada gaadiid, warshadaha, matoorrada yar yar iyo waaweyn:-

   **B.**waa in ay buuxiyaan habraacyada tayada sjarcigan tilmaamayo iyo xeerarka ka farcami doono.

   **T**. lama soo dejin kara mashiinno iyo qalab kale oo sii daaya qiiq waxayeelleynay tayada iyo heerka hawada sharcigani qeexay, **iyada oo la raacayo halbeegyada ay Wasaaradda Gaadiidka XFS dejiso.**

## Qodobka 30aad

## Khidmadda Deegaanka

1. Iyadoo la ilaalinayo caafimaadka dadka Soomaaliyeed, Wasaaraddu, iyadoo la tashanaysa Waasaarada Maaliyadda ee Federaalka iyo khuburo aqoon durugsan u leh cimillada iyo deegaanka;



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE

b) Waxaa ay soo jeedin kartaa in cashuuraha lagu qaado dhoofinta ama soo-saarka badeecadaha qaarkood dib loogu celiyo deegaannada waxyeelladu soo gaartay.
t) Waxa kaloo Wasaaraddu ay soo jeedin kartaa mamnuucidda soo dejinta ama soo-saarka alaabooyinka waxyeellada u leh deegaanka.

2. Cashuurta ku xusan faqradda 1aad ee qodobkan waxaa loo raacayaa Nidaamka Maamulka Maaliyadda Dowladda (Public Financial Management);
3. Cashuurta waxaa qaadaya Wasaarada Maaliyadda ee Federaalka.

## Qodobka 31aad

## Wasakhowga Biyaha

1. Sharcigani marka uu dhaqan galo, qof kasta oo ku kaca waxyaabahan sharcigan mamnuucay ama xeerarka kale ee ilaalinta deegaanka ee ku shuba ama ku rida qashin deegaan biyoodka dabiiciga ah waxa uu galay fal dambiyeed waxaana lagu ciqaabi karaa sida ku xusan qodobka 84aad ee sharcigan.
2. Qofka lagu helo fal dambiyeedka ku xusan faqrada 1aad ee qodobkan, waxa kale oo lagu soo rogi karaa:

b) Kharashka ku baxaya nadiifinta deegaanka waxyeeladu soo gaartay. Kharashka waxa loo adeegsanayaa dib u soo celinta deegaanka iyadoo laga nadiifinayo wasakhda lagu shubay;
t) Bixinta magdhaw la siinayo cid kasta oo dhib ka soo gaartay wasakhda. Ciddii uu dhib soo gaaray waa in ay dacwad u gudbisaa maxkamadda isla markaana magdhawga waxaa go'aan ka gaaraya maxkamadda awooda u leh.

3. Iyadoo qodobada kor ku xusan aan waxba laga badelayn, Hay'adaha awoodda u leh waa in ay:

b) Dejiyaa nidaam lagu maamulayo waxyaabaha wasakhda ah ee biyaha la raacin karo (lagu shubi karo);
t) Ilaalinta tayada biyaha;

## Qodobka 32aad

## Heerarka Tayada Biyaha

1. Wasaaraddu, iyadoo la tashanaysa wasaaradaha ay khuseyso waa in ay soo saartaa heerka tayada:
    b. Biyaha la cabo



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE

t. Biyaha loo isticmaalo beeraha
j. Biyaha warshadaha
x. Biyaha kalluunka iyo duurjoogta

kh. Iyo isticmaalka noocyada kale ee biyaha

## Qodobka 33aad

## Warbixinta Warshadda

Dhamaan milkiilayaasha ama masuuliyiinta fulinaya mashaariicda waraabka dhulka, nidaamka bullaacadaha, warshadaha wax soo saara ama hawlaha kale ee ay ka dhalan karaan dareere wasakh ah oo lagu sii deynayo deegaan, waa in ay sagaashan **(90)** maalmood ka hor warbixin tifaftiran ugu soo gudbiyaan Wasaaradda, waana in ay warbixintana ku caddahay cadadka , tayada iyo waxyeelada ay u geysan karto degaanka.

## Qodobka 34aad

## Wasakhda Dareeraha

Wasakhda dareeraha iyo nidaamka maamulka bullaacadaha waxaa qeexi doona xeer-nidaamiye gaar ah.

## Qodobka 35aad

## Heerka Dhawaqa/Codka (Standards of Noise)

1. Wasaaraddu, iyadoo la tashanaysa wasaaradaha ay khusayso iyo xeeldheerayasha aqoonta u leh waa in ay:-
   b. Soo saartaa heerka dhawaqa iyo guuxa ee wasakhaynaya (dhibaateynaya) deegaanka si loo ilaaliyo caafimaadka dadweynaha iyo deegaanka.
   t. Dejisaa nidaamka iyo shuruudaha lagu qiyaasayo dhawaqa iyo guuxa.
   j. Ku amartaa guurista ama yareenta warshadaha jabaqda (shanqarta) badan samaynaya ee ku yaal goobaha la degan yahay, **Goobaha Waxbarashada, Goobaha Caafimaadka,** goobaha kaluumeysiga , goobaha Xanaanada Xoolaha, IWM.

## Qodobka 36aad

## Dhawaqa/Codka Ka badan Heerka la ogolyahay

Qofkii sameeya dhawaq ka sarreeya heerka la xaddiday ee ku qeexan xeer-nidaamiyaha jabaqda (shanqarta) **waxaa lagu oogayaa** fal dambiyeed.



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA THE UPPER HOUSE AQALKA SARE

## Qodobka 37aad

## Heerarka Urta aan Habooneyn

1. Wasaaraddu, iyadoo la tashanaysa wasaaradaha ay khusayso waa iney samaysaa:

   b. Nimaadka lagu cabirayo heerka ugu yar ee lagu xakameynayo wasaqeynta deeganka ee urta aan habooneyn.

   t. Qaabka ama tallaabooyinka lagu joojin karo urta aan habooneyn ee ay sababaan bani'aadamku ama si dabiiciyan u timaadda.

## Cutubka 7aad

## Xakamaynta Walxaha Khatarta ah

## Qodobka 38aad

## Maareynta Walxaha Halista ah

1. Wasaaraddu, iyadoo la tashanaysa wasaaradaha ay khuseyso, waxa ay soo saareysaa nidaamka xakameynta soo saarista ama soo dejinta walxaha halista ah si wafaqsan Halbeegyada Calamiga ah.
2. Wasaaraddu waa in ay **kor u qaaddaa aqoonta iyo xirfadda** saraakiisha kastamada ee heer Federaal iyo **heer** Dowlad Gobolleed ee Sharcigani tilmaamayo;
3. Walxaha halista ah waxa ka mid ah:

   sida sunta cayayaanka, walxaha cuntada wakhtigeeda dheereeya, bacriminta, kolooriinta iyo birta culus (chlorine and heavy metals) iyo Kiimikooyinka kale;
4. Iyagoo aan waxba laga badelayn qodobada kor ku xusan, xeer-nidaamiye ayaa qeexi doona:

   b. Noocyada walxaha iyo kiimikooyinka halista ah ee la xakameynaya waxaa qeexaya xeernidamiye gaar ah;

   t. Qorshaha maareynta walxaha halista ah;

   j. Hirgelinta heerarka caalamiga ah iyo habraacyada la xiriira maareynta walxaha halista ah;

   x. Waajibaadka in la sameeyo diiwaan walxaha halista ah, iyo macluumaadkooda;

   kh. Xakameynta soo dejinta iyo dhoofinta, oo ay ku jiraan dabagalka maraakiibta iyo howlaha kale ee kontaroolka xuduudaha sida lambarrada kastamyada (custom codes) iyo tallaabooyinka aqoonsiga (identification measures);



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

d. Ruqsad siinta iyo nidaamyada ururinta, qaadista iyo burburinta qashinka/**haraaga** walxaha halista **ah**;

r. Shuruudaha la xiriira maareynta wanaagsan ee ku aadan walxaha halista ah iyo howlgalka goobaha lagu burburiyo qashinka halista ah;

s. Shuruudaha bixinta qalabka badbaadada (safety equipment),nidaamka (procedures), iyo tababarka shaqaalaha ka shaqeeya walxaha halista ah;

Sh.Qodobo gaar ah oo la xiriira maareynta qashinka shucaaca, oo ay ku jiraan xakameynta ama mamnuucidda soo dejinta qalabka iyo alaabada abuuri kara ama noqon kara qashinka shucaaca (radiation).

## Qodobka 39aad

## Ruqsadda/Shaatiga Walxaha Halista ah

1. Lama soo dejin karo, dhoofin karo, lamana isticmaali karo badeecadaha (aaladaha) ay ku jiraan walxaha ama kiimikooyinka halista ah **ogolaansho/ruqsad/shati la'aan.**
2. Waxlaha ay ku jiraan kiimikooyinka halista lama soo saari karo (warshadeyn karo), keydin karo, lamana iibin karo, **iyada oo aan oggolaasho loo heysan.**
3. Xeer-nidaamiye ka soo baxa Wasaaradda ayaa qeexi doona nidaamka bixinta shaatiga ku xusan faqradda 1aad ee qodobkan.

## Qodobka 40aad

## Shucaaca (Radiation)

1. Wasaaraddu, iyadoo la tashanaysa hay'adaha ay khuseyso, waa in ay:
   b. dejiso halbeegyada/heerka shucaaca ee la ogol yahay;
   t. Samaysaa shuruudaha iyo habka lagu cabirayo shucaaca.

## Qodobka 41aad

## Mamnuucidda Ku Sii daynta (shubidda) deegaanka Kiimikooyinka, Shidaalka, iyo Walxaha Halista

1. Waa mamnuuc in lagu sii daayo (shubo) kiimikooyinka, walxaha halista ah, **shidaalka** ama waxkasta oo saliidi ku qasantahay,sida ku cad Sharcigan.
2. Qofka ku shuba ama sii daaya kiimikooyin, walxaha kale ee halista ah, saliidda ama wax saliidi ku jirto waxaa lagu oogayaa fal dambiyeed.
3. Qofka lagu helo in uu galay dambi/xadgudub sida ku xusan faqradda 2aad ee qodobkan, waxa ciqaabaha kale loo dheeraysiinayaa oo lagu xukumi in uu:
   B. Bixiyo kharashka lagu sifeynayo deegaanka ama biyaha lagu shubay.



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA · FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA · THE UPPER HOUSE

T. Magdhaw la siinayo dadka kale ee ay dhibaato ka soo gaartay

4. Milkiilaha ama masuulka goob wax soo saar ama meel wax lagu kaydiyo/lagu qaado ee  ee ay ka daataan walxo **halis ku ah deegaanka,** si aan waafaqsanayn Sharcigan waa in uu:-

   B. Si deg deg ah u wargaliyo Wasaaradda.

   T. Si degdeg ah u bilaabo nadiifinta

   J. U hoggaasamo amarrada Wasaaradda

5. Wasaaraddu waxaay dacwad ku soo oogeysa milkiilayaasha goobaha wax soo saar ka, goob wax lagu kaydiyo/lagu qaado kuwaas oo ku xadgudba waajibaadka ku xusan faqradda 4aad ee qodobkan.

6. Maxkamaddu marka ay qaadayso dacwad waa in ay tixgalisaa in uu qofku ku dhaqmay tallaabooyinka ku xusan faqradda 4aad qodobkan.

## Qodobka 42aad

## Deegaanka iyo Hawlgallada Batroolka

1. Cid kasta oo ku hawlan sahminta, baarista, soo saaridda, warshadeynta iyo hawlaha kale ee la xiriira batroolka waa in uu ilaaliyaa deegaanka si waafaqsan xeerkan, shuruucda kale ee Dalka iyo **xeerarka** caalamiga ah ee ilaalinta iyo daryeelka deegaanka.

2. Haddii shidaal ama wasakh lagu sii daayo ama lagu daadiyo biyaha Soomaaliya, wasakhdaas oo ka imanaysa  meelo kala duwan oo ay ka mid yihiin markab, doon, hawlgallada sahminta, soo saaridda ama ka faa'iideysiga kheyraadka dabiiciga ah ee badda gudaheeda, (Dhiiqowga, Duxidda) dikhowga  deegaanka ee arrimahaas ka dhasha waxaa masuul ka ah milkiilaha ama madaxa  goobta ay wasakhdu ka timid.

3. Haddii dikhowga ku xusan faqrada 2aad ee qodobkan aanu sabab u ahayn dayac bani'aadam (force majeure), Wasaaraddu iyadoo la kaashanaysa wasaaradaha ay khuseyso waxa ay:

   (b) qiimeynaysaa baaxadda waxyeelada ama dikhowga;

   (t) dejinaysaa tallaabooyinka loo baahan yahay in la qaado si loo yareeyo waxyeelada:

4. Iyadoo la tixgelinayo qiimeynta ku xusan faqrada 3aad ee qodobkan,  qofka masuulka ka ah goobta ay ka timid dikhowga waxaa lagu xukumi karaa in uu bixiyo magdhow & kharashka nadiifinta deegaanka la waxyeeleeyay.



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

5. Qofka ku xadgudba qodobkan waxa uu galay fal-dambiyeed waxaana lagu xukumayaa ganaax ama xadhig ama labadaba, iyadoo maxkamadu eegaysa xaddiga dhibaatada ama waxyeelada.
6. Waxa kale oo maxkamada awooda u leh ay ku xukumi kartaa in qofka fal-dambiyeedka lagu helay uu:
   b. Bixiyo magdhaw la siinayo cid kasta oo uu dhib ka soo gaaray
   t. Nadiifiyo oo dib u soo nooleeyo deegaanka wasakhoobay ama dhibku gaaray.

## Qodobka 43aad

## Ilaalinta iyo ka hortaga wasaqeynta Deegaanka

1. Wasaaraddu, iyadoo la tashanaysa wasaaradaha iyo hay'adaha ay khuseyso, waa in ay dejisaa isla markaana hirgelisaa qorshaha deg-dega ah ee wasaqeynta deegaanka oo ay ka mid yihiin:

   b) batroolka ku daata badda ama beriga;

   t) Daadashada walxaha halista ah;

   j) Shilalka warshadaha;

   d) Hawlaha kale ee horseedi kara masiibo caafimaad ama waxyeelo deegaanka.

2. Qorshooyinka wasaqeynta deegaanka ee ku xusan faqrada 1aad ee qodobkan, waa in loo qeybiyaa dhamaan hay'adaha Dowladda ee heer Federaal iyo heer Maamul Goboleed.

## Qodobka 44aad

## Maareynta Walxaha Daciifiya Lakabka Hawada sare ee ku jira qabta waxyabaha kicya Heer kulka (Ozone)

1. Wasaaraddu, iyadoo la tashanaysa wasaaradaha ay khuseyso, waxay samaynaysaa cilmi baaris iyo daraasado kuwaas oo tilmaamaya horumarka dhanka sayniska ee ku aadan walxaha iyo ficilada waxyeelleeya (daciifiya) lakabka ozone-ka (stratospheric ozone layer), caafimaadka aadanaha iyo deegaanka;
2. Iyadoo la raacayo faqradda 1aad ee qodobkan,Wasaaraddu waxa ay soo saaraysaa nidaam/tilmaamo(guidelines) isla markaana waxa ay qaadi doonta barnaamijyo la xiriira;



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA THE UPPER HOUSE AQALKA SARE

B) Ciribtirka walxaha, teknoolojiyadda iyo qalabka (aaladaha) waxyeellaynaya lakabka ozone ka, oo ay ku jiraan maaddooyinka/walxaha gacanta ka geysta kululaanshaha adduunka;

T) Joojinta, yareynta ficilada horseedi kara daciifidda lakabka Ozone ka; iyo

J) Yareynta (hoos u dhigidda) halisaha caafimaad iyo saamaynta deegaan ee ka dhalan kara burburinta (waxyeelleynta/daciifidda) Ozone ka.

3. Xeer-nidaamiye ka soo baxa Wasaaradda ayaa qeexi doona arrimaha la xiriira Ozone ka.

## Qodobka 45aad
## Tijaabooyinka

1. Qof kasta oo doonaya in uu sameeyo tijaabooyin, tijaabooyinkaas oo deegaanka ku sii dayn kara unugyada noolaha ah ama walxaha loo adeegsado tijaabooyinka, wuxuu u baahan yahay oggolaansho (shati).
2. Wasaaradda ayaa bixinaysa shatiga ku xusan faqrada 1aad ee qodobkan, iyadoo lala tashanayo Wasaaradda Caafimaadka ee JFS.

## Cutubka 8aad
## Ilaalinta Dhulka
## Qodobka 46aad
## Ilaalinta Dhulka

1. Wasaaraddu, iyadoo la tashanaysa wasaaradaha ay khuseyso ee heer Federaal iyo heer Maamul Gobolleed, waxa ay soo saaraysaa tilmaamo iyo amaro ku aadan ilaalinta deegaanka iyo isticmaalka dhulka oo ay ka mid yihiin:

   b) dayactirka dhulka xaalufay iyadoo la adeegsanayo tikniyoolajiyad ku habboon iyo dib-u dhirayn;

   t) xoojinta nidaamyada maareynta dhulka iyo kheyraadka dabiiciga iyadoo la tixgelinayo habka isticmaalka dhulka ee soo jireenka ah; iyo

   j) tallaabooyinka kale ee Wasaaraddu u aragto in ay lagama maarmaan yihiin.

2. Wasaaraddu iyadoo la tashanaysa wasaaradaha ay khuseyso, waxa ay la soconaysaa hirgelinta qorshaha isticmaalka dhulka.

## Qodobka 47aad
## Ilaalinta Keymaha

1. Wasaaraddu, iyadoo la tashanaysa wasaaradaha ay khuseyso ee heer Federaal iyo heer Maamul Gobolleed, waxa ay soo saaraysaa tilmaamo qeexaya



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

tallaabooyin ku saabsan ilaalinta, maareynta iyo isticmaalka joogteysan ee keymaha Soomaaliya;

2. Marka la dejinayo tilmaamaha ku xusan farqada 1aad ee qodobkan waa in la tixgeliyaa:
    b) Goobaha keymaha ah ee la ilaaliyo, oo ay ku jiraan keymaha dhulka keydka ah, seerooyinka iyo jardiinooyinka Qaranka;
    t) duurjoogta ku nool dhulka keymaha;
    j) isticmaalka iyo maareynta kaymaha;
    x) adeegsiga dhaqameedka kaymaha iyo noocyada dhirta muhiimadda gaarka ah u leh bulshada deegaanka; iyo
    kh) ilaalinta noolaha kala-duwan.

## Qoobka 48aad

## Xaalufinta Dhirta

1. Sharcigani waxa uu mamnuucayaa shididda, soo dejinta iyo dhoofinta dhuxusha;
2. Marka laga reebo geedaha ama dhirta qalaad sida geedka garan waaga (invasive plants), Sharcigani waxa uu mamnuucayaa jaridda (goynta) kheyraadka dhirta ee la doonayo in loo badelo dhuxul;
3. Si loo dhimo isticmaalka gudaha ee dhuxusha iyo xaabada isla markaana loo helo tamar lagaga maarmo, wasaarada waa in ay:
    b. Dhiiri gelisaa dadka ku howlan bixinta adeega tamarta aan dhuxusha ahayn;
4. wasaaradu waa in ay ku dadaashaa sidii loo heli lahaa ilo tamareed oo kala duwan isla markaana maalgelin ku samaysaa tamarta Dalka. Sidoo kale waa in wasaarada dhiirigelisaa shirkadaha gaarka ah, sidii ay u bixin lahaayeen adeeg tamareed oo jaban sida tamarta dabeysha, qoraxda, gaaska iyo biogas.
5. **Qofkii ku kaca faldemiyeedka ku xusan faqradda 1aad & 2aad waxaa lagu ciqaabayaa xabsi aan ka yareen 2 (labo) sano kana badneyn 5 (shan) sano ama ganaax lacageed oo u dhigma waxyeellada uu u geystay deegaanka.**
6. **Dowladda Soomaaliya waxay la waragaysaa wax kasta oo loo adeegsaday gelidda faldembiyeedyada ama ka qeybqaatay daabbulaadda ama dhoofinta waxyaabaha sharcigan dhexdiisa lagu mamnuucay.**

## Qodobka 49aad

## Ilaalinta Dhulka Qoyan

1. Wasaaraddu iyadoo la tashanaysa Wasaaraddaha ay khuseyso, waxa ay qeexaysaa tallaabooyinka lagu ilaalinayo dhulka qoyan;
2. Wasaaraddu waxa ay goobo cayiman u aqoonsan kartaa dhul qoyan oo deegaan ahaan nugul, goobahaas oo lagu soo rogi karo xadidaad dhanka horumarka ah ama ficilada kale ee waxyeelayn kara;
3. Marka laga reebo ogolaansho qoraal ah oo ka soo baxayWasaaradda, iyadoo la tashanaysa hay'adaha ay khuseyso, qofna ma sameyn karo:
    b) Sheegashada dhul qoyan ama qalajinta dhulka qoyan;
    t) Ficilo carqaladeyn kara dhulka qoyan ficiladaas oo saameyn ku yeelan kara xayawaanka iyo dhirta ku nool dhulka qoyan;
    j) ku abuurid xayawaan ama dhir;
4. Waa in la sameeyaa Qiimeynta Saameynta Deegaanka iyo Bulshada, ka hor inta aan la fulin howlaha laga yaabo inay saameyn ku yeeshaan dhulka qoyan;
5. Qof kasta oo jabiya qodobkan iyo xeer-nidaamiye ku salaysan qodobkan wuxuu muteysanayaa Xabsi aan ka badneeyn laba sano/ganaax u dhigma ama labadaba.
6. Wasaaraddu waxaay soo saari kartaa xeer-nidaamiye ku saabsan ilaalinta dhulka qoyan.

## Qodobka 50aad

## Ilaalinta Webiyada

1. Wasaaraddu, iyadoo la tashanaysa Wasaaraddaha ay khuseyso, waxa ay qeexaysaa tallaabooyinka lagu ilaalinayo webiyada;
2. Iyadoo la raacayo farqada 1aad ee qodobkan, ogolaansho la'aan qofna ma samayn karo arrimaha socda:

    b. taagid, dib u dhis, dhigid ama ku shubid, bedelid, dheereyn, ama ka saarid webiga gudahiisa ama hareerahiisa;

    t. qodis, daloolin, ama wax ka bedelid salka webiga;

    j. ku beeris wabiga gudahiisa ama hareerahiisa dhir, Xayawaan ama ku shubid walax kasto oo saameyn ku yeelan kara deegaanka;

    x. leexiya ama xirid marinka webiga; ama
3. Qofka ku xadgudba qodobka 50aad ee sharcigan waxa uu galay fal-dambiyeed waxaana lagu xukumayaa xạbsi aan ka badnayn saddex sano/ganaax u dhigmo ama labaduba. Wasaaraddu waxa ay soo saari kartaa xeer-nidaamiye ku saabsan ilaalinta webiyada.



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE

## Qodobka 51aad

## Ilaalinta Buuraha

1. Wasaaraddu, iyadoo la **tashanaysa** wasaaradaha ay khuseyso ee heer federaal iyo heer Dowlad Gobolleed, waxa ay soo saari doontaa tilmaamo iyo tallaabooyin lagu ilaalinayo buuraha;
2. Iyadoo la raacayo faqradda 1aad ee qodobkan, Wasaaraddu waxa ay qeexi doontaa buuraha halista ugu jira nabaad-guurka deegaanka iyo masiibooyinka dabiiciga ah;
3. Buuruhu waxay halis ugu jiraan nabaad-guurka deegaanka ama masiibooyinka dabiiciga ah:
   b) Marka ay u nugul yihiin nabaad-guurka carrada ama ay ka muuqato calaamado nabaad-guur;
   t) haddii ay buurtu dildilaac yeelato;
   j) haddii ay jiraan calaamado muujinaya in ay adagtahay in dhir ama doog ka soo baxo buurta;
   x) marka dhirta laga jarayo ay ka badan tahay dhirta ka soo baxaysa ama lagu beerayo buurta; ama

   kh) haddii isticmaalka dhulka ee buurtu horseedi karto burbur deegaan.

3. Wasaaraddu, iyadoo la kaashanaysa wasaaradaha ay khusayso ee heer federaal iyo heer Maamul Gobolleed, waxaay qaadaysaa tallaabooyinka dib u soo celinta iyo dhiraynta dhulka buuraleyda ah.
4. Iyadoo aan waxba laga badalayn Cutubka 11aad ee Xeerkan, hawgallada ku aadan baarista, qodista iyo guud ahaan ka faa'idaysiga kheyraadka macdantu waa in ay ilaaliyaan deegaan dabiiciga ah, yareeyaan ama xakameeyaan qashinka, si deg deg ah ay wax uga qabtaan haddii dikhow deegaan dhaco.
5. Iyadoo aan waxba laga badalayn qodobkan iyo qodobada kale ee xeerkan, intii suuragal ah, qof kasta oo ku hawlan ka faa'idaysiga macdanta waxaa waajib ku ah dayactirka iyo soo celinta dhulka macdanta laga qoday ama la saahmiyay iyadoo dhulkaas lagu soo celinayo xaaladdii uu ku sugnaa ka hor intii aan macdanta laga qodin ama la sahmin.

## Qodobka 52aad

## Maareynta Dhul-daaqsiimeedka

1. Wasaaraddu, iyadoo la tashanaysa wasaaradaha ay khuseyso, waa in ay soo saartaa tilmaamaha iyo tallaabooyinka lagu maareynayo ka faa'iideysiga dhul-daaqsiimeedka.



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA THE UPPER HOUSE AQALKA SARE

2. Wasaaraddu marka ay soo saarayso tilmaamaha iyo tallaabooyinka hoose farqada (1), waxa ay tixgelinaysaa

   (b) xadiga daaqa iyo xoolaha daaqi kara (carrying capacity of the land);

   (t) baahida loo qabo in la ilaaliyo nafaqada carrada iyo biyaha;

   (j) halista xaalufinta degaanka ee soo wajahi karta dhul-daaqsiimeedka;

   (x) qodobada kale ee ay Wasaaraddu u aragto in la tixgeliyo.

## Qodobka 53aad

## Ilaalinta Goobaha Taariikhiga ah

1. Wasaaraddu, iyadoo la tashanaysa Wasaaradda ay khusayso ee heer federaal iyo heer Maamul Gobolleed, waxa ay:
   b) Diiwaan gelinaysaa, aqoonsanaysaa goobaha dabiiciga ah, kuwaas oo muhiimad Qaran ugu fadhiya dadka Soomaaliyeed dhaqaale ahaan, dhaqan ahaan iyo deegaan ahaanba;
   t) Haynaysaa diiwaanka goobaha iyo walxaha dabiiciga ah ee ku xusan faqradda (b) ee qodobkan, iyadoo la raacayo nidaam la qeexay; iyo
   j) Soo saaraysaa tilmaamo iyo tallaabooyin lagu maareynayo laguna ilaalinayo walxaha dhaqanka iyo goobaha la diiwaan galiyay si waafaqsan qodobkan.



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

## Cutubka 9aad

## Isbedelka Cimilada

## Qodobka 54aad

### Barnaamijyada wax lagaga Qabanayo Isabdelka Cimilada

1. Iyadoo lala kaashanayo Wasaaradaha ay khuseyso, isla markaana laga qayb galinayo bulshada, Wasaaraddu waxa ay dejinaysaa isla markaana ay hirgelinaysaa xeeladaha iyo barnaamijyada :-

   b) kor loogu qaadayo heerka aqoonta dadka Soomaaliyeed ee ku saabsan saameynta isbedelka cimilada iyo waxyaabaha keena;

   t) wax ka qabashada saameynta isbedelka cimiladu ay ku leedahay ilaha biyaha, xeebaha, dhulka, sugnaanta cuntada, noolaha kala duwan, kalluumeysiga, dhaqaalaha, kaabayaasha bulshada iyo u nuglaanta masiibooyinka dabiiciga ah;

   j) hirgalinta barnaamijyada iyo mashaariicda lagu ilaalinayo ilaha biyaha, xeebaha, dhirta, dhulka, noolaha kala duwan, kalluumeysiga iyo kaabayaasha bulshada, iyo inay gacan ka geystaan fayo-qabka caafimaadka iyo hab-nololeedka dadka Soomaaliyeed; iyo

   x) ka qayb qaadashada shirarka iyo fagaarayaasha caalamiga ah iyo kuwa gudaha iyada oo ujeeddadu tahay in la helo kaalmo wax ku ool ah oo wax looga qabanayo saameynta isbedelka cimilada.

2. Wasaaraddu waa in ay dejisaa tallaabooyinka ku aadan **u diyaar garowga** isbaddelka cimilada iyo yareynta qaaca hawada lagu sii daayo.



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

## Qodobka 55
## Kala-Guurka Cadaalad ku-Dhisan (just Transition)

1. Soomaaliya waxa ay u bahantahay cadaalad ku dhisan si ay ugu gudubto hormar iyo dhaqaale waara oo si cadaalad ah u helo, gaar ahaan kuwa sida tooska ah u saameyey isbaddelka cimilada.
2. Wasaaradd,deegaanka iyo isbadalka cimilida waxa ay diyaarineysaa ayna fulineysa siyaasada Kala-Guurka cadaalad ku-dhisan si sare logu qaado fursadaha bulsho iyo dhaqaale ee isbadalka cimilada keenaan, iyadoo la yareenayo, si taxadar lehna loo maareenayo caqabad ama khatar kasta.
3. Mabaadi'da Caalamiga ah ee Kala-Guurka Ku-dhisan waa in lagu xaqiijiyaa wada-hadal bulsho oo wax ku ool ah oo dhexmara dhammaan qeybaha bulshada uu sameeyey isbadalka cimilada sida ganacsatada, muruqmaalka/shaqaalaha/xoogsatada iyo Dowladda Fedaraalka/ Dowlad Goboleedyada, iyadoo la ixtiraamayo mabadi'da asaasiga ah ee shaqada iyo xuquuqda shaqalaha.

## Qodobka 56aad
## Shaybaarka Deegaanka

1. Wasaaraddu waa in ay:
   - b) Sameeysaa shaybaar deegaan;
   - t) Qeexdaa shaybaarka deegan ee la aqoonsan yahay si ay u baaraan muunadaha (samples) la xiriira arrimaha deegaanka.
2. Wasaaraddu waa in ay qeexdaa, iyadoo ku soo saareysa faafinnada rasmiga ah ee Dowladda:
   - b) Hawlaha ay qaabanayaan shaybaarka deegaanku;
   - t) Nidaamka shaqo ee ku aadan muunadaha hawada, biyaha, carrada iyo walxaha kale ee la baarayo, qaabka loo qorayo warbixinta shaybaarka iyo khidmadda baaritaanka;
   - j) Wixii kale ee loo baahan yahay si loo fududeeyo hawlaha shaybaarka.
3. Iyadoo la tashaneeysa wasaaradaha ay khuseyso, wasaaraddu waxa ay qeexaysaa nidaamka muunadda loo qaadayo si loo baaro.



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

## Cutubka 11aad

## Qiimeynta Saameynta Deegaanka iyo Bulshada

### Qodobka 57aad

### Qiimeynta Saameynta Deegaanka iyo Bulshada

1. Qofka raba in uu fuliyo mashruuc waxaa ku waajib ah in uu sameeyo Qiimeynta Saameynta Deegaanka iyo Bulshada, ka hor inta aan la bilaabin mashruuca, xiitaa haddii qofku haysto ruqsad ama ogolaansho uu ku fuliyo mashruuca.
2. Qiimeynta Saameynta Deegaanka iyo Bulshada waxa ay khuseysaa mashaariicda deegaanka waxyeeleyn kara. Mashaariicdaas waxaa ka mid ah:
   B. Warshadaha Shidaalka soo saara iyo kuwa sifeeya ee berriga iyo badda
   T. Alluminiyam,
   J. Layrka (Nalka) iyo **Anteenooyinka Isgaarsiinta.**
   X. Warshadaha saameyntoodu ay gobolo kala duwan iskaga gudbi karto.
3. Isagoo faqrada 2aad ee qodobkan aan waxba laga badelayn, Wasaaraddu waxa ay xeer-nidaamiye ku soo saaraysaa liisto mashaariicda iyo warshadaha loo baahan yahay in ay sameeyaan Qiimeynta Saameynta Deegaanka iyo Bulshada.
4. Wasaaraddu waxa ay wax ka badal iyo dib u eegis wakhti leh ku sameynaysaa liiska markii loo baahdo.

### Qodobka 58aad

### Dabagalka Saameynta Deegaanka iyo Bulshada

1. Qofka raba in uu fuliyo mashruuc, kaasoo ah mashaariicda ku xusan Lifaaqa 1aad ee ku lifaaqan Sharcigan, waxaa ku waajib ah in uu sameeyo Qiimeynta Saameynta Deegaanka iyo Bulshada isla markaa uu bixiyo kharashka ku baxaya qiimayntaas (daraasadda);
2. Qiimeynta Saameynta Deegaanka iyo Bulshada waa in la sameeyaa ka hor inta aan mashruuca la fulin;
3. Lama bixin karo ruqsad, taas oo ogolaanaysa in la fuliyo mashruuc iyadoo aan la sameyn Qiimeynta Saameynta Deegaanka iyo Bulshada .
4. Wasaaraddu waa in ay la socotaa hawlaha (mashaariicda) iyo ficilada deegaanka saameyn ku yeelan kara: dhulka, hawada iyo biyaha Soomaaliya.

### Qodobka 59aad

### Hab-raaca Qiimeynta Saameynta Deegaanka iyo Bulshada

1. Xeer-nidaamiye ayaa qeexi doona qaabka loo samaynayo Qiimeynta Saameynta Deegaanka iyo Bulshada.
2. Iyadoo faqrada 1aad ee qodobkan aan waxba laga badelayn, Xeer-nidaamiyuhu waa in uu qeexaa:
   - b) Nooca mashaariicda loo baahan yahay in ay sameeyaan Qiimeynta Saameynta Deegaanka iyo Bulshada ;
   - t) Nidaamka Qiimeynta Saameynta Deegaanka iyo Bulshada sida warbixinta loo qorayo (format), tijaabinada saynis (baaris) iyo arrimaha kale ee la xiriira hubinta qiimeynta;
   - j) Foomamka loo baahan yahay in la buuxiyo iyo khidmadda (fee) la qaadayo ee Qiimeynta Saameynta Deegaanka iyo Bulshada sida codsiga, warbixinta, qiimeynta, natiijada iyo ansixinta;
   - x) Awooddaha hay'adaha ku shaqada leh Qiimeynta Saameynta Deegaanka iyo Bulshada iyo dhaqan gelinteeda;
   - Kh) Ansixinta (bixinta ogolaansho) iyo shuruudaha ku xiran;
   - d) Dhaqangelinta shuruudaha ku xiran mashaariicda ogolaanshaha la siiyay;
   - r) Xadgudubyada shuruudaha Qiimeynta Saameynta Deegaanka iyo Bulshada iyo ciqaabtooda.

### Qodobka 60aad

### Warbixinta Qiimeynta Saameynta Deegaanka iyo Bulshada

1. Iyadoo la raacayo qodobka 58aad ee Sharcigan, waa in milkiilaha mashruuc uu sameeyaa Qiimeynta Saameynta Deegaanka iyo Bulshada .
2. Warbixinta la diyaariyay ee ku saabsan Qiimeynta Saameynta Deegaanka iyo Arrimaha Bulshada waa in loo gudbiyaa Wasaaradda;
3. Warbixinta ku xusan faqradda 2aad ee qodobkaan waa in ay ku jiraan dhamaan macluumaadka ku saabsan mashruuca, si waafaqsan xeer-nidaamiyaha Qiimeynta Saameynta Deegaanka iyo Bulshada iyo arrimaha bulshada. Waa in warbixinta loo diyaariyaa qaabka (format & guidelines) la ogolyahay.

   Macluumaadka waxaa ka mid ah:

   - b) Xaalada hadda ee goobta **ku sugan tahay** (existing condition)



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA THE UPPER HOUSE AQALKA SARE

t) mashruuca, tallaabooyinka lagu ilaalinayo deegaanka iyo haddii masiibo dhacdo sida loo yareynayo khasaaraha ka dhalan kara;

j) Saameynta deegaan ee mustaqbalka la filan karo.

4. Warbixinta ku xusan qodobkan waa in uu diyaariyaa khabiir madax banaan.
5. Wasaaraddu waxa ay codsan kartaa macluumaad ama caddaymo dheeraad ah. Wasaaraddu waxa ay u xilsaari kartaa khabiir wasaaradda ka socda. Ka hor inta wasaaraddu sidaas yeelin, waa in uu fursad siiyaa cidda mashruuca leh si fikirkooda loo maqlo.

## Qodobka 61aad

## Guddiga Qiimaynta Saameynta Deegaanka iyo Bulshada

1. Wasaaraddu waa in ay samaysaa Guddi farsamo oo lagu magacaabo Guddiga Qiimeynta Saameynta Deegaanka iyo Bulshada.
2. Guddiga farsamo waxa uu ka talo bixinayaa qoraallada ama warbixinta laga sameeyo qiimaynta deegaanka. Agaasimaha guud ayaa qeexi doona qaabka iyo nimaadka shaqo ee gudiga.
3. Xubnaha Guddigu waxay noqonayaan:
    b) Xubnaha farsamo ee Wasaaradda
    t) Xubin ka socota wasaaradaha ay khuseyso
    j) Xubnaha kale ee ay Wasaaradda u aragto in ay Guddiga qayb ka noqdaan

## Qodobka 62aad

## Ruqsad ama Shati

1. Marka ay ku qanacdo warbixinta Qiimeynta Saameynta Deeganka iyo Bulshada, Wasaaraddu waxay bixinaysaa ogolaanshaha fulinta mashruuca isla markaana waxa kale oo ay raacin kartaa shuruudaha loo baahan yahay in la tixgaliyo si loo ilaaliyo deegaanka, kheyraadkana si waara looga faa'idaysto.
2. Haddii Wasaaraddu ku qanci waydo warbixinta Qiimeynta Saameynta Deegaanka iyo Bulshada , mashruuca lama fulin karo, wax ruqsad ahna lama bixinayo.
3. Wasaaraddu waxay burin kartaa ama dib ula noqon kartaa ogolaansho ay bixisay, haddii lagu xadgudbo shuruudaha la socday ruqsadda sida ku xusan faqrada 1aad ee qodobkan.



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA THE UPPER HOUSE AQALKA SARE

4. Haddii ruqsad la buriyo, la tirtiro ama lala noqdo, sida ku xusan faqradda 3aad ee qodobkan, haystaha ruqsaddu ma sii wadi karo mashruuca ilaa inta uu ruqsad cusub ka helayo.
5. Qofka ku qanci waaya go'aanka Wasaaradda, waxa uu racfaan u qaadan karaa maxkamadda ku xusan qodobka 86aad ee xeerkan.

### Qodobka 63aad

### Mudnaan gaar ah oo la xiriirta Ruqsadda

1. Wasaaradda looma qabsan karo haddii ay dhibaato ka dhalato mashruuc **si sax ah loo** qiimeeyay oo ruqsadna la siiyay.
2. Difaac ma noqon karto haysashada ruqsadda qiimaynta saamaynta deegaanka, haddii ficil madani ah lagu soo oogo hirgaliyaha mashruuca oo ku saabsaan sida mashruuca loo maareeyay ama loo fuliyay.

### Qodobka 64aad

### Xaqa helidda Xogta

1. Haddii aanu jirin dan guud ama mid gaar ah oo warbixinta qiimeynta sir ka dhigaya, qof kastaa wuu **heli** karaa warbixinta iyo natiijooyinka Qiimeynta Saameynta Deegaanka iyo Bulshada.
2. Sirta ganacsiga (trade and business secrecy) waa in mar kasta la ilaaliyaa.

## Cutubka 12aad

## Hagaajinta iyo Dib u soo Celinta Deegaanka

### Qodobka 65aad

### Waajibaadka dib u hagaajinta Deegaanka

1. Dowladaha xubinta ka ah Federaalka waa inay hubiyaan in goobaha wasakhaysan la hagaajiyo, gaar ahaan haddii goobahaasi horseedi karaan waxyeelo ama khatar caafimaad.
2. Wasaaraddu waa in ay diiwaan gelisaa goobaha wasakhaysan isla markaana diiwaankaasi uu noqdaa mid dadweynuhu heli karaan.
3. Wasaaraddu waxay sameyn kartaa baaritaan, kormeer iyo dib u hagaajin ku aadan goobaha wasakheysan ama waxa ay u xilsaari kartaa cid kale in ay samayso, haddii:
    b. Halis degdeg ah ay jirto;
    t. Qofka goobta wasakheeyay aanu awoodin in uu nadiifiyo; ama
    j. Qofka goobta wasakheeyay uu wax ka qaban waayo.



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE

## Qodobka 66aad

## Masuuliyadda Kharashka

1. Qofka masuulka ka ah wasakheynta ayaa bixinaya kharashka hagaajinta ama nadiifinta.
2. Haddii ay laba qof iyo in ka badan ay masuul ka yihiin **waskheynta,** bixinta kharashku waxa ay ku xiran tahay xaddiga wasakheynta qof kasta uu gaystay.
3. Dowladda aya bixinaysa qaybta kharashka qofka la waayo;
4. Wasaaradda ayaa soo saaraysa sida loo qaybinayo bixinta kharashka dadka dhibka gaystay;
5. Wasaaraddu waxa ay qofka dhibka gaystay ka dalban kartaa in uu keeno damaanad, taas oo laga hayn doono inta uu bixinayo kharashka baarintaanka, kormeerka iyo hagaajinta goobta la wasakheeyay.

## Qodobka 67aad

## Amarka dib u soo celinta Deegaanka

1. Iyadoo la tixgelinayo qodobada Sharcigan, Wasaaraddu waxa ay soo saari kartaa amarka dib u soo celinta deegaanka;
2. Amarka dib u soo celinta deegaanka ee ku xusan faqradda 1aad ee Sharcigan:
    b. **Waxa** uu ku amri karaa qofkii deegaan waxyeeleeya in uu deegaanka ku soo celiyo sidii uu ahaa ka hor intii aanay waxyeeladu soo gaarin;
    t. Waxa uu amarku ka hor istaagi karaa qof, in uu qaado tallaabooyin waxyeelaynaya deegaanka;
    j. Waxa uu amarku ku aadanaan karaa qof in uu bixiyo magdhaw la siinayo dadka ay waxyeello ka soo gaartay ficilada uu qof ku kacay ee uu deegaanka wax ugu dhimay;
    x. Waxa uu amarku qofka ku soo rogi karaa ganaax lacageed.
3. Amarka dib u soo celinta deegaanka waxa ku qornaan kara shuruudaha iyo waajibaadyada kale ee dib loogu soo celinayo deegaanka, si loo gaaro arrimaha ku xusan faqradda 2aad ee qodobkan;
4. Iyadoo aan waxba laga badelayn faqradda 2aad ee qodobkan, amarka dib u soo celinta deegaanku, waxuu qofka uu ku socdo ku amri karaa:
    b. Qaadidda tallaabooyinka lagaga hortagaayo ama lagu joojinaayo wasakheynta deegaanka;
    t. In dhulka lagu soo celiyo sidii uu ahaa isla markaana la nadiifiyo carrada, dhir dib loogu beero, lana soo celiyo qaab dhismeedkii



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA THE UPPER HOUSE AQALKA SARE

dhulka, astaamihii taariikhiga ee uu dhulku lahaa, taas oo ay ku jirto xeebaha iyo agagaarka badda;

j. Joojinta tallaabo kasta oo waxyeelayn karta deegaanka;

x. Ka saaridda (bixinta) shay dhulka la galiyay ama lagu aasay;

kh. Ka hortagga dhawicidda dhulka, dhirta, xayawaanka iyo biyaha (qaybaha kala duwan ee biyaha dhulka Soomaaliya);

d. Ka bixinta qashin lagu aasay dhulka ama goob kale (sida badda, webiyada) isla markaana burburinta qashinkaasi si waafaqsan qodobbada Sharcigan;

r. Bixinta magdhawga amarku qeexayo.

5. Soo saaridda amarka dib u soo celinta deegaanka waxaa hagaya:

   b. Mabaadi'da wanaagsan ee maareynta deegaanka iyo qodobbada Sharcigan; iyo

   t. In qofka uu amarku ku socdo loo sharaxo wixii dhacay, lana ogeysiiyo xaqa uu u leeyahay rafcaan in uu ka qaato go'aanka isagoo **cabasho** u gudbinaya maxkamadda awooda u leh.

## Qodobka 68aad

## Wargelinta Taxadar ka (Precautionary Notice)

1. Haddii sarkaal deegaan uu ka shakiyo in hawl meel ka socota (ama ficil kale) ay saamayn ku yeelan karto deegaanka, sarkaalka deegaanka waxa uu milkiilaha ama qofka hawsha masuulka ka ah siinayaa, ogeysiis lagaga dalbanayo in uu sameeyo arrimaha ku xusan faqrada 2aaad ee qodobkan.
2. Ogeysiiska ku xusan faqrada 1aad ee qodobkan waxa uu amri karaa in la sameeyo waxyaabahan:

   b. In macluumaad ku saabsan hawsha ama ficilka meesha ka socda loo gudbiya Wasaaradda, taas oo lagu caddaynayo in hawshu aanay deegaanka saamayn ku lahayn;

   t. In la qaado tallaabooyin kale oo lagu yaraynayo saamaynta ficilkaasi ku yeelan karo deegaanka;

   j. In wax ka badel ama hagaajin lagu sameeyo hawsha meesha ka socota. Wax ka badelkaas ama hagaajintaas waa in ay ku qancaan hayadaha awooda u leh dalab kasta oo lagu yaraynayo ama dhimayo saamaynta deegaanka.

3. Qof kasta oo loo gudbiyo ogeysiiska ku xusan qodobkan, waa in uu ka soo baxaa dalabka ogeysiiska ku xusan isla markaana uu kaga soo jawaabaa



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE

wakhtiga loo qabtay. Jawaabta waa in ay ku qancaan hay'adaha awoodda u leh oo ay isla qaataan in hawsha meesha ka socota aanay saamayn ku lahayn deegaanka;

4. Qofka ogeysiis loo gudbiyo sida ku xusan qodobkan ee:
   - b. Ka soo bixi waaya dalabka ogeysiiska; ama
   - t. Qancin waaya hayada awoodda u leh, in hawshu meesha ka socota aanay saamayn ku lahayn deegaanka –

Waxa uu galay fal dambiyeed oo waxa lagu xukumayaa –

- b. Ganaax lacageed oo u dhigma dhibka uu geystay deegaanka.
- t. Haddii uu deegaanka dhib weyni soo gaaray, ganaax lacageed oo u dhigma dhibka uu deeganka geystay ama xarig aan ka 6 bilood ama labadaba.

## Qodobka 69aad

## Wargelinta Hawl Joojin

1. **Wargelinta** ku xusan qodobkan waxa la bixin karaa marka loo baahdo, ~~oo~~ kumana xirna qodobka 68aad ee Sharcigan;
2. Haddii Wasaaraddu ay dareento in hawl ama ficil meel ka socda uu halis degdeg ah ku yeelan karo deegaanka, waxa ay soo saaraysaa **Wargelinta** ku xusan qodobkan.
3. **Wargelinta** qodobkan–
   - b. Waxa loo diri karaa qofka ay Wasaaraddu aaminsantahay in uu hawsha ama ficilka wado ama masuulka ka ah;
   - t. **Wargelinta** waa in lagu qeexaa ficilka ama hawsha iyo dhibaatada ay deegaanka gaarsiinayso; iyo
   - j. **Wargelinta** waxaa lagu dalban karaa in ficilka ama hawsha la joojiyo ilaa inta hay'addu ku qancayso in halis deegaan aanay jirin;
4. **Wargelinta** ku xusan qodobkan, waxa la soo saari karaa xiitaa haddii ruqsad ama ogolaansho loo haysto in la sameeyo ficilka ama hawsha.
5. Wasaaradda ruqsadda bixisay masuul kama noqonayso wixii khasaare ah ee ka dhashay joojinta hawsha.
6. Qof kasta oo –
   - b) Ka soo bixi waaya qodobbada **Wargelinta** (dalabka **Wargelinta**);
   - t) Isagoo ogeysiiska la soo gaarsiiyay, hadana qofka kale u ogolaada in hawsha uu sii wado isagoo ku xad gudbaya qodobbada **Wargelinta;**



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE

j) Si ula kac ah u jabiya (ugu xadgudba) qodobbada **Wargelinta**
Waxa uu qofkaasi galay fal dambiyeed, waxaana lagu xukumayaa ganaax dhan ama xarig aan ka badanayn 3 bilood.

7. Maxkamaddu waxa kale oo ay qofka ku soo rogi kartaa ciqaab dheeri ah taas oo noqon karta:
   b) In uu qofku hagaajiyo deegaanka uu dhibka soo gaaray;
   t) Bixiyo lacag (kharashka). Dowladdu ku hagaajinayso deegaanka dhibku soo gaaray; ama uu magdhaw siiyo cid kasta uu dhib kasoo gaaray ficilkiisa.

## Cutubka 13aad
## Maareynta Qashinka
### Qodobka 70aad
### Maareynta Qashinka

1. Maamul Goboleed kasta isagaa masuul ka ah maareynta qashinka **deegaannada** uu maamulo;
2. Qashinka ka soo baxa Maamul Goboleed, maaha in uu wasakheeyo deegaanka Maamul Gobolleed kale.
3. Maamul Goboleedyadu waa in ay iska kaashadaan **maareynta** wasakheynta xuduudaha iskaga gudba;
4. Maamuul Gobolleedyadu waa in wixii khilaaf ah ee ku saabsan wasakheyn/qashin xuduuda ka gudbay, si nabad ah u xaliyaan;
5. Haddii ay xal ka gaari kari waayaan, waxaa dhexdhexaadinaysa Wasaaradda iyadoo:
   b. Cayimaysa meesha qashinku ka yimid (source);
   t. In tallaabooyin lagu joojinayo uu qaado Maamulka uu qashinku ka yimid;
   j. Magdhaw la siiyo Maamulka dhibku soo gaaray;
   x. Tallaabooyin kale oo lagu xalinayo khilaafka.
6. Wasaaraddu waxa ay soo saari kartaa xeer-nidaamiye ku aadan maareynta qashinka.

### Qodobka 71aad
### Qashinka/Haraaga la Dhigo Goobaha aan loogu tala galin

1. Iyadoo aan waxba laga badelayn qodobka 70aad, waa mamnuuc in qashin lagu tuuro wadooyinka, xeebaha, webiyada, ilaha biyaha iyo dhamaan goobaha aan loogu talo galin in qashinka lagu tuuro ama **lagu** rido.



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE

2. Qashinka waxa lagu tuuri karaa ama **lagu** ridi karaa meelaha gaarka loogu diyaariyay in qashinka lagu rido;
3. Dowladaha hoose ama cida ay u igmadaan ayaa mas'uul ka ah goobaha qashinka lagu ridaayo iyo dayactirkooda, waana in dadweynuhu helaan goobo qashinka loogu tala galay oo aan ka fogayn.
4. Qofkii ku xadgudba qodobkan waxa uu galay fal-dambiyeed waxaana lagu xukumayaa ganaax aan ka yareyn xadgudubka uu geystay ama xabsi aan ka badnayn 15 maalmood ama labadaba.

## Qodobka 72aad

## Mamnuucid bacaha

Iyadoo la tixgelinayo dhibaatada ay soo gaarsiiyaan deegaanka, Sharcigani waxa uu mamnuucayaa bacda fudud **iyo dhamaan kuwa ay isku bahda yihiin** (light weight single use plastic).



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

## Cutubka 14[aad]

## Noolaha Kala Duwan

### Qodobka 73[aad]

### Ilaalinta Noolaha Kala Duwan

1. Wasaaraddu, iyadoo la tashanaysa wasaaradaha ay khuseyso, waa in ay dejisaa isla markaana dhaqan galisaa Siyaasaddo iyo Barnaamijyo lagu ilaalinaayo noolaha kala duwan ee Soomaaliya, gaar ahaan:
    - b. Xakameynta iyo ciribtirka geedaha shisheeye (invasive species);
    - t. Ilaalinta iyo daryeelka noolaha kala duwan (species);
    - j. Ilaalinta iyo xakameynta duurjoogta Dalka iyo kuwa shisheeye ee la keeno waddanka ama ka sii gudbaya Soomaaliya;
    - x. Xakameynta ka ganacsiga duurjoogta Dalka iyo kuwa shisheeye
    - Kh. Ilaalinta iyo ka hortagga in ay dilaacaan cudurada xayawaanka laga qaado.
    - d. Aqoonsiga iyo isticmaalka aqoonta dhaqan ee dadka Soomaaliyeed, aqoonta casriga ah kuwaas oo lagu maareynayo noolaha kala duwan ee Dalka;
    - r. Samaynta seerooyin (goobo gaar u ah noolaha kala duwan), iyo hirgelinta tallaabooyinka lagu dhawrayo noolaha kala duwan ee Soomaaliya;
    - s. Horumarinta teknoolojiyaddaha la xiriira noolaha kala duwan ee Soomaaliya;
    - Sh. Hirgelinta nidaam lagu kor meerayo (lagula soconayo) arrimaha la xiriira ama saameyn ku leh noolaha kala duwan ee Soomaaliya.
    - Dh. Wasaaraddu waa in ay qaadaa tallaabooyinka kale ee ay u aragto in ay lagama maarmaan u yihiin ilaalinta iyo daryeelka noolaha kala duwan.
2. Wasaaraddu waa in ay qaadaa tallaabooyin lagu ilaalinayo noolaha halista ugu jira in ay dabargo'aan iyo dhamaan xayawaanka halista ku sugan.
3. Wasaaraddu waxay soo saareysaa Xeer-Nidaamiye, si loo hirgeliyo arrimaha ku xusan qodobkan.

### Qodobka 74[aad]

### Ilaalinta Duurjoogta iyo Shimbiraha

1. Xayawaanka duurjoogta, shimbiraha iyo gaar ahaan, noocyada aan badnayn ee halista ugu jira in ay dabargo'aan iyo deegaannada ay ku nool

yihiin waa in la ilaaliyaa iyadoo la raacayo xeer-nidaamiyeyaasha iyo amarada kale ee ay soo saarto Wasaaradda, iyadoo la tashanaysa wasaaradaha ay khuseyso;

2. Si loo fuliyo faqrada 1aad ee qodobkan, waa in daraasad lagu sameeyaa noolaha kala duwan ee Dalka iyadoo la diiwaan gelinayo xayawaanka Dalka, xaaladda uu ku sugan yahay, noocyada xayawaanka, kuwa halista ugu jira in ay dabargo'aan iwm. Sidoo kale waa in la diiwaan geliyaa hoyga noolaha kala duwan.
3. Tallaabooyinka iyo amarada ku xusan faqradda 1aad ee qodobkan waxaa ka mid noqonaya goobaha la ilaaliyay ee duurjoogtu ku nooshahay iyo seerayaasha, iyadoo la qeexayo:
   - b) Magaca iyo soohdimaha goobaha la ilaaliyay.
   - t) Seerayaasha Qaranka (National parks);
   - x) Goobaha kale ee ay cayinto Wasaaradda, iyadoo la tashanaysa wasaaraddaha ay khuseyso.
4. Waxaa la mamnuucay ugaarsiga sharci darrada ah, dhoofinta iyo ka ganacsiga duurjoogta iyo dhamaan duurjoogta shuruucda caalamku ay mamnuuceen ka ganacsigooda, sida heshiiska Caalamiga ah ee Mamnuucaya ka Ganacsiga noocyada noolaha, dhirta iyo duurjoogta dabargo'a halista ugu jirta.
5. Cid kasta oo ku kacda xadgudub ka dhan ah qodobkan, wuxuu galay fal-dambiyeed, waxaana lagu xukumay ciqaab u dhaxeysa lix bilood ilaa lix sano ama ganaax lacageed. Ciqaabta iyo ganaaxa waxaa loo eegayaa halista fal-dambiyeedka iyo cida falka gaysatay.
6. Iyadoo aan waxba laga badelayn faqrada 5aad ee qodobkan, qofka fal-dambiyeedka galay, waxa kale oo lagu xukumi karaa:
   - b. In lala wareego duurjoogta iyo qalabka loo adeegsaday ugaarsiga sida hubka iyo gaadiid la isticmaalay;
   - t. In lala wareego dhammaan wixii manaafacaad ah ee laga helay ka ganacsiga duurjoogta;
   - j. In lagala noqdo shaati ama ruqsad ganacsi, ama ruqsad kale oo la siiyay qofka fal-dambiyeedka galay.
   - x. Bixinta kharashka dib ugu celinta duurjoogta dalkii ay ka yimaadeen, haddii la dammaanad qaado in la celinayo;



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

## CUTUBKA 15aad

## Ilaalinta Deegaanka Badda iyo Xeebaha

### Qodobka 75aad

### Ilaalinta Deegaanka Badda

1. Wasaaraddu, iyadoo la tashaneysa Wasaaradaha ay khuseyso, waxa ay soo saaraysaa xeer-nidaamiye ku habboon oo lagu ilaalinayo, yareynayo ama xakameynayo wasakheynta deegaanka badda iyadoo laga ilaalinayo:
   b) Wasakhda ka timaada beriga oo ay ku jiraan wasakhda lagu shubo ama la raaciyo webiyada iyo dhuumaha;
   t) Maraakiibta iyo matoorada kale ee laga isticmaalo xeebaaha;
   j) Qalabka ama aaladaha loo isticmaalo sahminta ama ka faa'iideysiga kheyraadka dabiiciga ah ee badda gunteeda; iyo ilaha kale ee wasakheyn kara deegaanka badda.

### Qodobka 76aad

### Ilaalinta Xeebaha

1. Wasaaraddu, iyadoo la tashanaysa wasaaradaha ay khusayso ee heer Federaal iyo heer Maamul Goboleed, waa iney sameeysaa daraasad ku saabsan xeebaha iyo qorshaha Qaran ee maareynta xeebaha.
2. Warbixinta daraasadda ku xusan faqrada 1aad ee qodobkan waxay ka koobnaan kartaa:
   b) tirakoob dhamaystiran oo ku aadan dhismooyinka, jidadka, dekeddaha, qashin qubka iyo goobaha kale ee ku yaal xeebaha;
   t) xaaladda geedaha (mangroves) iyo marsooyinka laga helo xeebaha;
   j) tirakoob dhamaystiran oo ku saabsan goobaha qiimaha leh ee dhanka dalxiiska (madadaalada) iyo dhaqanka;
   x) tirakoob ku saabsan goobaha xeebaha muhiimadda gaarka ah u leh cilmi-baarista la xiriirta kalluumeysiga, nabaad-guurka iyo arrimaha kale ee la midka ah;

   kh) Qiyaasta xadiga ciidda badda iyo walxaha kale ee laga qaado ama saaro badda;

   d) qiyaasta saameynta nabaad-guurka xeebaha; iyo
   r) qiyaas ku saabsan wasakhowga badda, ilaha ay ka yimaadaan iyo burburka deegaanka xeebaha;
   s) qiyaas ilaha biyaha macaan ee laga heli karo xeebaha; iyo



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

sh) wixii xog iyo macluumaad kale ah ee la xiriira xeebaha.

3. Ogolaansho la'aan qofna xeebaha Dalka kama samayn karo:

   b) taagid, dhisid, dhigid ama ku shubid, bedelid, dheereyn badda ama hareeraheeda;

   t) qodis, daloolin, ama wax ka bedelid salka badda ama xeebta;

   j) ku beeris dhir badda gudaheeda ama hareeraheeda;

   x) ku shubid ama ku ridid xayawaan ama noole kale badda gudaheeda ama xeebta;

   kh) ku shubidda walax kasta oo saamayn ku yeelan kara deegaanka badda; iyo

   d) ficilada kale ee wasakheyn kara xeebaha.
4. Qof kasta oo ku xadgudba qodobbadan wuxuu galay fal dambiyeed waxaana lagu xukumayaa ganaax ama xabsi ama labadaba. Maxkamadda ayaa xadideysa ganaaxa ama mudada xabsi iyada oo eegeysa waxyeelada dhacday.

## Cutubka 16aad

## Xadgudubyada Deegaanka

### Qodobka 77aad

### U hogaansanaan La'aanta Shuruudaha Ilaalinta Deegaanka

Qof kasta oo ku guul dareysta inuu u hoggaansamo shuruudaha ku xusan ruqsadda ama oggolaansho sharci wuxuu galay fal dambiyeed waxaana lagu ciqaabi doonaa ganaax lacageed ama xabsi muddo ah oo aan ka badnayn 6 bilood, **haddii aan ciqaab ka beddelan lagu xusin sharcigan dhexdiisa.**

### Qodobka 78aad

### Bixinta macluumaad been abuur ah

Qof kasta oo si ula kac ah u bixiya ama u baahiya macluumaad been abuur ah oo ku saabsan codsiyada uu qeexayo Sharcigan ama Xeer-nidaamiye wuxuu galayaa fal dambiyeed waxaana lagu **ciqaabayaa hab waafaqsan Xeerka Ciqaabta Soomaaliyeed.**



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE

## Qodobka 79aad

## Fulinta Mashruuc aan Ogolaansho haysan

1. Ciddii fulisa mashruuc aan ogolaansho haysan sida ku xusan Sharcigan waxa uu galay fal dambiyeed waxaana lagu ciqaabi doonaa ganaax lacageed ama xabsi muddo aan ka badnayn 2 sano.
2. Ka sakow ciqaabta ku xusan faqradda 1aad ee qodobkan, maxkamaddu waxay ku soo rogi kartaa qofka fal dambiyeedka galay in uu bixiyo kharashka dib u soo celinta goobta oo mashruuca ka sameeyay (ama samayn rabay).

## Qodobka 80aad

## Xadgudubyada Qiimeynta Saameynta Deegaanka iyo Bulshada

1. Qof kasta oo:

b. **Ku** xadgudba qodobka Cutubka 11aad ee Sharcigan ee keeni waaya warbixinta mashruuc;

t. Sameyn waaya Qiimeynta Saameynta Deegaanka iyo Bulshada sida ku xusan Sharcigan iyo Xeer-nidaamiyeyaasha la soo saaro;

j. Ka been abuura warbixinta Qiimeynta Saameynta Deegaanka iyo Bulshada ,

Waxa uu galay fal dambiyeed waxaana lagu ciqaabi doonaa ganaax lacageed oo u dhiganta falka uu ku kacay ama xabsi mudo aan ka badnayn 3 sano.

## Qodobka 81aad

## Xadgudubyada Kormeerka

1. Iyadoo aan waxba laga badelayn qodobka 20 aad ee Sharcigan, qof kasta oo:

b. Carqaladaya ama hor istaaga Sarkaal Deegaan oo gudanaya waajibaadkiisa ku xusan Sharcigan ama Xeer-nidaamiye;

t. Diida codsi ka yimid Sarkaal deegaan oo waafaqsan Sharcigan

j. U diida Sarkaal deegaan in uu galo dhisme, dhul, doon, gaari/baabuur iwm

x. Iska dhiga (isku eekaysiisa) Sarkaal deegaan;

Kh. U diida Sarkaal deegaan in uu eego dokumentiyo uu dalbaday;

d. Diida in uu sheego magaciisa iyo goobta uu degan yahay ama sheegta magac been ah iyo goob aan sax ahayn;

r. Marin habaabiya ama macluumaad khaldan u sheega Sarkaal deegaan;

s. Diida, dayaca, ka soo bixi waaya in uu sameeyo amar hagaajin ah oo loo soo jeediyay; Waxa uu galay fal dambiyeed waxaana lagu xukumayaa ganaax lacageed ama xabsi mudo aan ka badnayn 3 bilood.



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA · FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA · THE UPPER HOUSE · AQALKA SARE

## Qodobka 82aad

## Xadgudubyada Heerarka Deegaanka

1. Qof kasta oo:

b. Ku xadgudba heer deegaan oo uu dhigayo Sharcigan ama Xeer-nidaamiye soo baxay;

t. Ku xadgudba qodobbada Sharcigan;

j. Ku takrifala kheyraadka dabiiciga ah ama si **wanaagsan** u isticmaalin isla markaana jabiya qodobbada Sharcigan, Waxa uu galay fal dambiyeed waxaana lagu xukumayaa ganaax lacageed ama xabsi aan ka badnayn 1 sano.

## Qodobka 83aad

## Xadgudubyada Qashinka Halista ah, Kiimikooyinka iyo Walxaha Shucaaca

1. Qof kasta oo:

b. U maareyn waaya qashinka halista ah, sida uu dhigayo Sharcigan ama Xeer-nidaamiye;

t. Soo dejisa qashin halis ah, taas oo aan waafaqsaneyn Sharcigan;

j. Si ula kac ah magac khalad ah ugu qorta qashinka iyo walxaha halista ah;

x. U maareyn wayda kiimikooyinka iyo walxaha shucaaca sida uu dhigayo Sharcigan;

Kh. Ku kacda ama ka qayb qaadata kootarabaanin sharci darro ah (illegal trafficking) oo ku saabsan qashinka halista ah, kiimikooyinka, sunta iyo walxaha kale ee halista ah;

d. U burburisa kiimikooyin si aan waafaqsaneyn Sharcigan;

r. Bixin wayda ama been ka sheegta macluumaadka ku saabsan qashinka halista ah, kiimikooyinka, walxaha shucaaca iwm,

Waxa uu galay fal dambiyeed waxaana lagu xukumayaa ganaax lacageed ama xabsi muddo aan ka badnayn 3 sano.

## Qodobka 84aad

## Xadgudubyada Wasakheynta

1. Qof kasta oo:

b. Ku sii daaya ama ku shuba wasakh (qashin) deegaan biyood si aan waafaqsaneyn Sharcigan ama Xeer-nidaamiye;

t. Wasakheeya deegaanka



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA THE UPPER HOUSE AQALKA SARE

j. Ku sii daaya ama **ku** shuba deegaanka wasakh;

Ku sii daaya ama **ku** shuba deegaanka wasakh; Waxa uu galay fal dambiyeed waxaana lagu ciqaabayaa si waafasan Xeerka Ciqaabta Soomaaliyeed.xukumayaa ganaax lacageed ama xabsi muddo aan ka badnayn 3 bilood.

2. Ka sokow xukunka ku xusan faqradda 1aad ee qodobkan, qofka fal dambiyeedka geystay waxa kale oo lagu soo rogi karaa:

b. In uu bixiyo kharashka lagu nadiifinayo deegaanka uu waxyeelada gaarsiiyay;

t. In uu nadiifiyo deegaanka uu waxyeelada gaarsiiyay

3. Iyadoo aan waxba laga badelayn faqradada 1 & 2 ee qodobkan, bi'iyaha (polluter) waxa kale oo lagu xukumi karaa in uu bixiyo magdhaw la siinayo ciddii ay dhibaato ka soo gaartay wasakheynta uu geystay. Qiyaasta magdhawgu waxa uu ku xiran yahay khasaaraha ka dhashay falka.

## Qodobka 85aad

## Cabasho

Qof kasta oo ku qanci waaya go'aanada Wasaaraddu soo saarto, sida uu dhigayo xeerkan ama xeerarka ka sii farcama, waxa uu **cabasho** u qaadan karaa maxkamadda.

## Qodobka 86aad

## Ciqaab Guud

Qof kasta oo ku xadgudba qodobbada Sharcigan ama xeer-nidaame ka sii farcama oo aanay jirin ciqaab goonni ah ama aanay cuslayn ciqaabta uu Sharcigani dhigayo, waxaa loo raacayaa ciqaabta xarig & ganaax ee ku xusan Xeerka madaniga iyo ka ciqaabta guud.

## Qodobka 87aad

## Maxkamadda Awooda u Leh Arrimaha Degaanka

1. Iyadoo la raacayo Xeerka Nidaamka Garsoorka, maxkamadda awooda u leh xukunka arrimaha degaanka ee Sharcigani dhigayo waa kuwa ku xusan Dastuurka iyo Sharciga Nidaamka Garsoorka 1974 (ama sharciga cusub ee lagu badelo) sida Maxkamada Degmada, Maxkamadda Gobolka, Maxkamadda Rafcaanka iyo Maxkamada sare.
2. Heerarka kala duwan ee maxkamadaha ku xusan faqrada 1aad ee qodobkan, waa in ay yeeshaan qayb (Environmental Bench or Desk) u qaabilsan dacwadaha deegaanka;



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA THE UPPER HOUSE AQALKA SARE

3. Maxkamadaha waa in lagu tababaraa arrimaha la xiriira shuruucda deegaanka;

## Cutubka 17aad
## Dhaqangelinta Sharciga
### Qodobka 88aad
### Awoodda Dhaqan gelin ee Heer Federaal

1. Dhaqangelinta Sharcigan waxaa masuul ka ah Wasaaradda Deegaanka & Isbaddelka Cimilada;
2. Wasaaraddu waxay fulinaysaa awooddaha gaarka ah ee uu siinayo Sharcigani.

### Qodobka 89aad
### Awoodda Dhaqangelin ee Heer Maamul Gobolleed

1. Maamul Goboleedyadu waa in ay Sharcigan sidiisa u dabaqaan.
2. Maamul Goboleedyadu iyagoo raacaya qodobbada Sharcigan, waa in ay soo saaraan Sharciga Maareynta Deegaanka ee Heer Maamul Goboleed.
3. Xeerarka Maareynta Deegaanka ee Maamul Goboleedyada ee haatan jira waa in dib u eegis lagu sameeyaa si loo waafajiyo Sharcigan iyo Siyaasadda Qaran ee Maareynta Deegaanka.
4. Maamul Goboleedyadu waxa ay fulinayaan awoodaha uu Sharcigani siinayo.
5. Dowladdaha hoose ayaa door muhiim ah ku leh fulinta Sharciga sida maareynta qashinka.

### Qodobka 90aad
### Kormeeris

Wasaaradda ayaa kormeeraysa isla markaana la soconaysa dhaqangelinta Sharcigan iyo Siyaasadda Qaran ee Maareynta Deegaanka.

### Qodobka 91aad
### Hay'adaha kale ee qaybta ku leh Fulinta iyo Dhaqangelinta Sharcigan

1. In si wax ku ool ah loo dhaqan geliyo Sharcigan iyo Xeer-nidaamiyayaasha la soo saaro waxa loo baahan yahay:

b. In dhamaan qaybaha kala duwan ee Dowladdu ay ka qayb qaataan fulinta Sharcigan iyo xeerarka ilaalinta deegaanka iyagoo
   i. Raacaya go'aanada Wasaaradda
   ii. Codsiyada Wasaaradda



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA THE UPPER HOUSE AQALKA SARE

## Cutubka 18aad

## Qodobo Gaar ah

### Qodobka 92aad

### Iskaashiga Ganacsiga Gaarka ah

1. Wasaaraddu waa in ay iskaashi dhaw la yeelataa ganacsatada;
2. Ganacsatada waxaa lala gali karaa heshiisyo ama is afgarad ku saabsan heerarka deegaanka iyo wakhtiga loo baahan yahay in la gaaro heerarkaas;

### Qodobka 93aad

### Baaritaanka ku saabsan Wasakheynta Deegaanka

1. Wasaaraddu waa in ay sameeysaa baaritaano lagu ogaanayo wasakheynta deegaanka isla markaana hubiyaan tallaabooyinka la qaaday ee wax lagaga qabanayo;
2. Baaritaanada ay sameeyaan Wasaaradaha deegaanka ee Maamul Goboleedyadu waa in ay u soo gudbiyaan Wasaaradda Deegaanka iyo isbeddellada cimilada.

### Qodobka 94aad

### Baaritaano Joogta ah

Wasaaraddu waxa ay soo jeedin kartaa in la sameeyo baaritaano joogto ah oo ku aadan warshadaha, sida kuwa shidaalka, goobaha qashinka lagu burburiyo iyo mashiinada dhismaha.

### Qodobka 95aad

### Macluumaadka iyo Sirta Xogta

1. Masuuliyiinta, khubarada iyo saraakiisha kale ee dhaqan gelinaysa Sharcigan, waxaa waajib ku ah in ay xafidaan sirta ama xogta ay hayaan;
2. Macluumaadka sirta ah ee masuuliyiintu helaan si waafaqsan Sharcigan, la lama wadaagi karo waddamada shisheeye. Waxa lala wadaagi karaa oo kaliya haddii uu jiro heshiis caalami ah ama Xeer heer Federaal ah oo ogol.
3. Wasaaradda ayaa masuul ka ah maamulka iyo hab-raaca ku saabsan faqradda 2aad ee qodobkan.

### Qodobka 96aad

### Qaadista Khidmadaha

1. Bixinta ruqsaddaha iyo adeegyada gaarka ah waxa laga qaadayaa lacag (fii);
2. Xadiga lacagta iyo foomka waxaa qeexi doona xeer-nidaamiye.



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

## Qodobka 97aad

## Tababarka iyo Daraasaadka

1. Wasaaraddu waxay horumarinaysaa aqoonta iyo xirfaddaha shaqaalaha u xilsaaran in ay dhaqan geliyaan Sharcigan;
2. Waxay taageeri karaan cilmi baaris ama daraasado;
3. Si loo yareeyo wasakheynta deegaanka, waxa ay dhiiri gelinayaan horumarinta makiinadaha iyo warshadaha casriga ah;
4. Wasaaradda ayaa sameynaysa qiimeyn guud oo ku saabsan waxtarka tababarada iyo daraasadaha la sameeyay hal mar sanadkii.

## Qodobka 98aad

## Iskaashiga Caalamiga ah ee Ilaalinta Deegaanka

1. Wasaaradda ayaa:

b. ka qayb galeysa ururada caalamiga ah iyo barnaamijyadda caalamiga ah iyo kuwa Gobolka ee ilaalinta deegaanka;

t. dhaqangelinaysa heshiisyadda caalamiga ah ee ku saabsan ilaalinta deegaanka;

j. Si loo kobciyo awoodda Dalka ee ku aadan deegaanka, Wasaaraddu waxay wada shaqayn dhaw la yeelanaysaa machadyada caalamiga ah ee aqoonta u leh arrimaha deegaanka;

x. dejinaysa nidaamka looga qayb galayo heshiisyada iyo kulamada caalamiga ah. Waa in ay Soomaaliya matalaan dad aqoon u leh arrimaha deegaanka;

kh. hogaaminaysa la shaqeynta ururada Gobolka isla markaana hubinaya in Soomaaliya ay qayb ka noqoto kulamada kana war hayso wixii ka soo baxa;

d. hageysa raadinta isla markaana diyaarinaya nidaamka loo marayo sidii loo heli lahaa kaalmo ku aadan dhaqan gelinta heshiisyada caalamiga ah iyo barnaamijyadooda;

## Qodobka 99aad

## Heshiisyada Caalamiga ah

1. Soomaaliya waxay qayb ka tahay heshiisyada caalamiga ah ee ku xusan Lifaaqa 2aad ee ku lifaaqan Sharcigan;
2. Shuruucda deegaanka ee Dalka waa in ay waafaqaan heshiisyada caalamiga ah ee ay Soomaaliya qaybta ka tahay.



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

## Qodobka 100aad

### Xeer-nidaamiye

Wasaaraddu, iyadoo la tashanaysa Wasaaradaha ay khuseyso ee heer Federaal iyo heer Maamul Gobolleed, waxay diyaarineysaa xeer-nidaamiye ku saabsan arrimaha xeerkani ogolyahay in xeer-nidaamiye loo sameeyo si loo dhaqan geliyo qodobbada xeerkan.

## Qodobka 101aad

### Xeerarka Hore ee Deegaanka

**Sharcigan wixii laga waayo waxaa loola noqonayaa Xeerka Ugaarsiga iyo Ilaaalinta Keymaha ee Xeer Lr. 15 soona baxay 25 Jannaayo 1969.**

## Qodobka 102aad

### Dhaqangalka Sharciga

Sharcigani wuxuu dhaqangelayaa, kadib marka ay ansixiyaan labada gole ee sharci-dejinta, madaxwaynuhuna saxiixo, laguna soo saaro faafinta Rasmiga ah.

## Liifaaqa 1aad

## Nooca Mashaariicda loo baahan yahay in la sameeyo Qiimeynta Saameynta Deegaanka iyo Bulshada

Mashruuc kasta oo saameyn ku yeelan kara nawaaxigiisa, dhulka iyo guud ahaan deegaanka waa in la sameeyaa Qiimeynta Saameynta Deegaanka iyo Bulshada sida uu dhigayo Sharcigani ama xeer ka sii farcamay. Mashaariicdaas waxaa ka mid ah (laakiin kuma koobna oo kaliya):

1. Soo saaridda shidaalka
2. Warshadaha nukliyaarka
3. Horumarinta Magaalooyinka
4. Dhismaha wadooyinka iyo marinada kale ee gaadiidka
5. Biyo xireen
6. Macdan qodista
7. Warshadaha wax soo saara
8. Kaabayaasha layrka (nalka)
9. Goobaha qashin qubka (qashinka lagu burburiyo)
10. Mashruuc kasta oo xeer kale ama xeer-nidaamiye uu qeexayo

## Lifaaqa 2aad

## Liiska Heshiisyada Caalamiga ah

Muddadii ka horreysay 1991, Soomaaliya waxay qeyb ka ahayd dhowr heshiis oo caalami ah oo ku saabsan ilaalinta deegaanka. Waxaa intaa dheer, sannadihii u danbeeyay Soomaaliya waxay saxeexday heshiisyo badan oo la xiriira deegaanka. Iyadoo la aqoonsan yahay in mushkiladaha deegaanku ay xuduudaha iskaga gudbaan, dalku wuxuu saxeexay ama ansaxiyay heshiisyo muhiim ah oo dhinacyo badan taabanaya oo ku saabsan arrimaha deegaanka. Liistada soo socota waa heshiisyada ay Soomaaliya saxiixday ama ay ansixisay:

1. Heshiiska Caalamiga ah ee Mamnuucaya ka Ganacsiga Noocyada Noolaha Dhirta iyo Duurjoogta Dabargoa ku dhaw ama halista ku sugan (CITES);
2. Heeshiiska Ilaalinta Xayawaanka (duurjoogta) Xuduudaha iskaga Goosha;
3. Heshiis Goboleedka Ilaalinta Badda Cas iyo Deegaanka Gacanka Cadmeed;
4. Heshiis Goboleedka iyo Iskaashiga lagula Tacaalayo ama looga Hortagayo Wasakhaynta Shidaalka (batroolka) iyo Walxaha halista ah;
5. Heshiiska Qaramada Midoobay Sharciga Badda;
6. Heshiiska Qaramada Midoobay ee la Dagaalka Nabaad-guurka (Xaalufka) (UNCCD);
7. Heshiiska Qaramada Midoobay ee Isbedelka Cimilada (UNFCCC);
8. Heshiiska Kyota;
9. Heshiiska Noolaha Kala Duwan;
10. Heshiiska Sugnaanta (ilaalinta) Noolaha (Protocol on Bio-Security) (Protocol-ka Cartagena);
11. Heshiisyada Basel, Stockholm iyo Rotterdam;
12. Heshiiska Bariga Afrika Seerayaasha, Ilaalinta Dhirta (flora) iyo Xayawaanka (fauna);
13. Heshiiska Bariga Afrika ee ka hortagga wasakhda badda ee xaaladaha degdegga ah;
14. Heshiiska Ilaalinta, Maareynta iyo Horumarinta Deegaanka Badda iyo Xeebaha Bariga Afrika (Heshiiska Nairobi).
15. Heshiiska Xakamaynta Waxyaabaha Daciifiya lakabka Ozone ka (Montreal Protocol)
16. Heshiiska Ilaalinta Lakabka Ozone ka (Heshiiska Vienna);



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE